




Akhriste maanka geli oo weligaa xusuusta ku haay, Websitku inuusan wax shaqo ah ku lahayn qoraalka hoose, ammaan iyo eedba waxaa mas'uul ka ah qoraaga buugga ee fadlan wixii {comments} ugu gudbi Emailkiisa....

1993 illaa 1995 waxaan qoray (3) buug iyo (3) sheeko oo taxane ah waxay kala ahaayeen:

- * Sababihii Burburka Soomaaliya: {paper-back book printed in Canada 1999}
- * Sooyaalka Soomaaliya: {paper-back book printed in Canada 1999}
- * Tiirka Colaadda: {Paper-back book printed in Malaysia 2002}
- * Salaamullaahi Calal Xujaaj: sheeko taxane ah waxaan ku qoray wargeyska Xog-Ogaal
- * Dahabo Toolmoon & Dhagaxkariye: sheeko taxane ah waxaan ku qoray “ “
- * Beesha Toban Kunley: sheeko taxane ah waxaan ku qoray wargeyska Xog-Ogaal.

Qoraallada sare ku xusan, dhowr akhriste ayaa dood iyo muran ka keenay oo waxay u arkeen {Controversial} dhan u janjeera. Sannadkaan waxaan qoray buug la yiraah: Hadimadii Gumeysiga & Halgankii Ummadda, wuxuu ka kooban yahay {21 chapters & 320 pages A5}. Hawshii laaxintirka hikaadda waa dhamaatay waxaase u harsan hawshii qurxinta iyo qaabaynta {artwork} ee daabacaadda ka horaysay, Insha-Allaah dhowaan ayuu soo bixi doonaa. Haddaba buuggaani si aanu u noqon {controversial} waxaan jeclaystay inaan akhristeyaasha hordhac ahaan ugu soo gudbiyo saddex cutub oo kala ah: **10aad, 11aad iyo 21aad.** Akhristeyaasha waxaan ka codsanayaa inay ii soo gudbiyaan: talo & tusaale, wax-ku-daris & wax-ka-dhimis, jawaab-celinta {feedback & comments} waxaa la iigu soo hagaajin karaa: Shirwac55@hotmail.com ama tifaftiraha wargeyska Ayaamaha ee Xamar. Si gaar ah waxaan u danaynayaa oo akhristeyaasha si weyn uga codsanayaa arrimaha hoos ku qoran:

- Cutubka 10aad: fadlan ka soo talo-bixi qeybta **dastuurkii dalka hooyo**, wax-ku-kordhin ama wax-ka-dhimis, siiba eraybixin kaga haboon Wasiir waxaa beddelay Dilaa-Sare.
- Cutubka 11aad: fadlan ka soo talo-bixi qeybta **magac kaga haboon** shanta magac ee aan ugu waqlalay kooxaha Tabcane Tigree.

- Cutubka 21aad: fadlan ka soo talo-bixi qeybta **afar wax lagu waayey laba laguma doon**, haddii la heli karo eraybixin kaloo kaga haboon.

=====

=====

Cutubka 10aad: Aas-aaskii 30ka Urur-qabiil:

Dagaalkii 77 faktii hore Soomaaliya ayaa ku guulaysatay, balse ugu dambeystii wuxuu isu beddelay guul iyo libin u soo hoyatay Ethiopia. Kornayl Mingiste markay u suurtoobi wayday inuu guluf milateri ku qabsado guud ahaan Soomaaliya, mar labaad wuxuu hindisay tab iyo xeellad cusub, taasoo si rasmi ah loogu burburiyey qarankii Soomaalida. Taariikhiyan bulshada Soomaalidu waa reer-guuraad hadba u naqraaca meeshii roob ka curto, waa madegane xoolaha daba socda oo aan lahayn deegaan ab laga soo gaar ah oo xudduntiisu ku aasan tahay, deegaankiisu waa cosobsi iyo berrinkii tigaad leh ee xooluhu xilligaas daaq ka helayaan, waxaana ugu wacan dabeecadda xoolo dhaqatada ayaa sidaas ah meel ay dunida ka joogaanba.

Dhaqankii reer-guuraagu wuxuu dhalay in bulshada Soomaalidu aysan ahayn waddaniyiin, in yar oo fara ku tiris ah mooyee, waxaa taas u sii dheer waa dad xiiso badan oo hadba meel cusub u hayaama. Tusaale u soo qaado Soomaalidii qurbaha u yaacday, waxaa la arkay qoys magangelyo weydiistay Kanada, sannad kadibna u guuray Awstaraaliya, sannad kadibna Ingiriiska iska dhiibay. Maahmaah tiro badan ayaa lagu fasiray cosobsiga iyo hayaanka geediga, waxaa ka mid ah “ragga socodku waa u door hadduu meel ku daalo amase qoore lushaa qayr ku jiraa iwm. Reer-guuraaga ratiga ayaa u raran oo geela ayey daba joogaan, hadba meeshii hashu ka hesho baad iyo biyo ayaa dalkooda ah, weligoodna kuma fekeraan inay yeeshaan deegaan rasmi ah oo cabiran. Sahan tirokoob loogu kuurgalay hab-dhaqanka bulshada ee la xiriira waddaniyadda, waxaa la ogaaday dadka Jareerka ah ee deggan jiinka wabiyada iyo dadka reer Xamarka ah ama Banaadiriga inay ka waddanisan yihiin daaqsatada reer-guuraaga ah oo dalkoodu yahay hadba meeshii ay joogaan. Laga soo bilaabo aas-aaskii SYL, Jareerka iyo Banaadirigu qeyb libaax ayey ka soo qaateen xarakaddii xorriyad doonka, illaa maantana waxay u geyfan yihiin midnimada Soomaali-weyn iyo masiir mustaqbal wacan leh, kana mid maaha kooxaha loo yaqaan Tabane Tigree ee mas’uulka ka qaranjabka Soomaaliya.

Kutubta lagu keydiyo taariikhdii dunidu soo martay, waxaa ku qoran ummaddo baaba’ay ama ummaddo kale ku milmay kuwaasoo hayb qarameed-koodii {identity} ay luntay, waayadii hore dhulkii ay deganaayeen ummaddo kale ka dhaxleen, sidaasna ku tirtirmay. Alle oo samatabixiya iyo iyadoo isdaba qabata mooyee, Soomaalida maanta in magaceedu lumo oo ay ummaddo kale ku dhex milanto ayaa laga baqayaa. Baddii sun baa lagu shubay berrigiina saxraa ayaa laga dhigay, dan guud waxaa lagu beddelay dan gaar, hidde dhaqankiina waa laga tegay. Soomaalida qurbaha u yaacday, markay waddamada Carabta joogaan waxay qaataan dharka Carabtu xirato sida: qamiis, cigaal, cimaamad iwm. Markay joogaan Yurub iyo Ameerika waxay qaataan dharka reer Galbeedku xirto sida {suit, tie & jeans}, Soomaalidu oo meel iskaga tuurtay dharkii ay

hidde dhaqanka u lahaan jirtay, maanta waa qowmiyadda qura ee aan lahayn lebbis lagu yaqaan iyo cunto hidde ahaan lagu yaqaan. {National dress & national dish}.

Hay'adda UNESCO ayaa ardayda Soomaalida ugu deeqday daabacaadda buugaagta dugsiyada ee fasallada Afka Soomaaliga, Hay'addu markii hore waxay aaminsanayd in Af-Soomaaligu mid qura yahay, hase ahaatee waxay la kulantay caqabado tiro badan. Beelaha Digil & Mirifle waxay ku doodeen in daabacaadda buugaagta laga dhigo laba nooc, qeyb Afka Maxaatiri lagu qoro iyo qeyb Afka Maymaay lagu qoro. Qeybtii Maxaatiri ayaa misna la sii kala qeybiyey, reer Woqooyi waxay ku andacoodeen in aysan reer Koofurta isku Af-Soomaali ahayn oo aysan is fahmi karin. Seben xumaadka iyo saranseerka qaxootiga, Soomaalidii saafida iyo isku sinjiga beri ahaan jirtay, maanta waa kala socotay oo midnimo waa ka salguurtay.

Alle mahadi Af-Soomaaligu waa luqad hodon ka ah dhan kasta Teknolojiyada mooyee, meselan Af-Ingiriiska naagta la qabo waxaa lagu yiraah {wife} keliya oo eray bixin kale maleh, laakiin Afka-Soomaaliga waxaa lagu yiraah (xaas, afo, arad, oori, xilo, marwo, maranti, bilcaan, daalli, geesaxir, u-dhaxday iwm). 1973kii markii la hirgeliyey qorista Far-Soomaaliga, guddigii loo xilsaaray dhaqangelintisa waxay go'aamiyeen eraybixintii Af-Soomaali laga waayo in laga qaato Carabiga, balse cilmiga Teknolojiyada laga qaato Af-Gireek sida ay ugu qoran yihiin Laatiinka. Sebenka qaranjabka Soomaalinimadii waxaa ka haray luqadii iyo muqaalkii isu-ekaanta keliya. Soomaalida oo aan ahayn waddaniyiin darteed, Af-Soomaaligii hodonka ahaa erayo tiro badan oo weliba muhiim ah ayaa laga tegay, tusaale eraygii *dukaan* waxaa lagu beddelay {shop} meel kasta waxaad ku arki shop hebel, sidoo kale eraygii laanta waxaa lagu beddelay {branch}, meel kasta waxaad ku arki branch hebel, maqaayada waxaa lagu beddelay (restaurant), meel kasta waxaad ku arki restaurant hebel. Ciwaanka iyo magacayda ku qoran goobaha ganacsiga 90% waa Af-Ingiriis. Inta badan Soomaalidu waa jaahiliin ay iskaga qaldan tahay cilmiga aqoonta iyo ku hadalka luqad shisheeye, Af qalaad aqoon maahan ee taas hala ogaado. Sebenka qaranjabka hoggaamiye kooxeedyadu markay idaacadaha ka hadlayaan, waxay isku barxaan Af-Soomaali iyo Af-Ingiriisi, sababtoo ah waxay aaminsan yihiin ku hadalka Af-Ingiriisku inuu yahay ilbaxnimo iyo dabaqad sare, fekradaasi waxay cuskan tahay jaahilnimo iyo liidnimo.

Sebenka qaranjabka waxbarashadii dalka waxaa gacanta ku dhigay oo si rasmi ah ula wareegay laba kooxood. Dhalinyarada loo yaqaan Gardheerayaasha oo laga soo khaliifay waddamada Carabta, waxaa qandaraas lagu siiyey inay ubadka Soomaaliyeed Carabeeyaan isla markaana rukumada u siibaan hidde dhaqanka Soomaalida. Kooxda labaad oo ah NGOS reer Galbeedka oo dantoodu tahay inay meelmariyaan mashruuca loo yaqaan *Kimis iyo Kitaab* laysku lamaaniyey {Biscuit and Bible} iyaguna waxay ku hawlan yihiin burburinta hida dhaqanka iyo hirgelinta Kirishtaanka. 1993kii 185 waxgarad oo ka tirsan culumada diinta ayaa soo saaray baaq ciwaankiisu ahaa *Ka Kacaay Kirishtaa Timide*. Kirishtaamaynta mustaqbalka fog ka sokow, iyaguna waxay qeyb libaax ka qaataan dhaqan doorsoonka laba-daraale tirtiris Af-Soomaaliga. Ardayda dhigata dugsiyada sare ee labadaan kooxood maamulaan Af-Soomaaliga waa ku hadlaan balse ma qoraan, xataa lama barin oo ma kala yaqaaniin: shaqal iyo shibbane, magac iyo magac-u-yaal, fal iyo fal-kaab iwm. Kooxda Gardheer waxay ardayda baraan Af-Carabi

iyo dhaqan Carbeed keliya, sidoo kale kooxda Kimis iyo Kitaab waxay ardayda baraan afafka reer Galbeedka iyo dhaqanka Cilmaaniyadda.

Murugmaarugtii Mucaaradka:

Maahmaah baa waxay leedahay “laba bilood is kama feer bishaan ee laba garood baa iska feer dhasha”. Taliskii MSBarre oo ahaa macangag arxambaran iyo waxaa is biirsaday jabhad-Soomaali aan waddani ahayn. Runtii xaq bay ahayd in la mucaarado oo laga horyimaado maamulkii qabyaaladda ku dhisnaa ee MSBarre, laakiin gar ma ahayn in Amxaaro la miciinsado oo muraadkii Mingiste la meelmariyo. Maalintii Soomaalidu dagaalka ku guuldaraystay ee ciidankeeda la jebiyey, bil kadib oo ku beegan 09/04/1978, koox Kornayl Maxamud Sheekh Cismaan “Cirro” horkacayey ayaa hollisay inqilaab milateri oo ay xukunka kaga qabsadaan MSBarre, waa ka dhicisoobay oo waa laga adkaaday. Intii la toogtay ama la xiray mooyee, intii kale oo Cabdullaahi Yuusuf Axmed horsocdo waxay hub ka doonteen Mingiste, taasina waxay bishaaro iyo bilqayr u ahayd cadowga Soomaalida oo ah Ethiopia.

Mucaaradkii magangalay Mingiste, waxay Amxaarada u ahayd fursad dahabi ah oo qarniyaal Ethiopia doon doonaysay, ciidan Ethiopiaan ah oo loo lebisay dharka jabhaddii SSDF oo ay gar-hayaan saraakiil midabka iyo magaca Soomaali ka ah, balse maanka Amxaaro ka ah ayaa Luulyo 1982 qabsaday degmooyinka Balanballe iyo Galdogob oo ka tirsan gobollada dhexe, waxaase Radio Adis-Ababa laga shaaciyey in Jabhadda SSDF ay burburisay ciidankii MSBarre oo ay ka xoraysay Balanballe iyo Galdogob. Saraakiil (siyaasi & milateriba) magaca Soomaali ka ah inay Radio Adis Ababa ka soo baahiyaan saddex xaraf (SSDF-SNM-USC-SPM-SDM iwm) oo lagu sheego jabhad xaq-u-dirir ah waxay noqotay wax laysugu faano {fashion} iyo bartilmaameed la tiigsado. Hadafkii soddonka urur-qabiil halaaggii laga dhaxlay oo faahfaahsan waxaaad ka helaya Buugga Sababihii Burburka Soomaaliya, cutubka Kacaankii Luggooyo, waaxda Mucaaradkii MSBarre xukunka ka tuuray.

Janaayo 1991kii dalka waxaa ka jirtay shanta urur-qabiil ee sare ku magaacaban, SNM mooyee inta kale dhowr garab ayey u kala jabeen oo qaar baa la toban jibaaray sida USC. Muddo shan sano ah oo ku began Janaayo 1995kii waxaa dalka ka jiray 53 urur-qabiil una sii qeybsan 30 urur-qabiil oo Zuu & Dhashiike ku hubaysan iyo 23 yar-yar oo afka iyo AK47 ku hubaysan, waxaa soo raaca 25 firqo diimeed, kuwaasi oo dhammaan isku magacaabay xaq-u-dirir hagaajinta maamulka u halgamaya, balse guuxa dadweynuhu wuxuu ku naanaysay *Raq Joogta Rafaadka Maandeeq*. Abwaannada ku xeesha dheer hal-abuurka maansada, ragga horbooda 30ka urur-qabiil waxay u bixiyeen dhowr magac oo runtii ku haboon. Mustafe Sheekh Cilmi, yoolka hoggaamiye kooxeedyadu higsadaan wuxuu ku tilmaamay “*Mar i dhaha Madaxweyne*”. Cabdulqaadir Xersi Yamyam, hab-dhaqanka dhiigya-cabyada dalka burburiyey wuxuu ku sifeeyey: *Midig-ku-dhiigle, maskax-ku-dhiigle, maan-ku-dhiigle, mici-ku-dhiigle, maqal-ku-dhiigle, maro-ku-dhiigle, maja-ku-dhiigle, midi-ku-dhiigle, magli-ku-dhiigle, manhaj-ku-dhiigle, magac-ku-dhiigle = wada-dhiigle, dhiig-dabaashe !!!*

Hoggaamiye kooxeedyadu waxay ka midaysan yihiin laba arrimood: tan 1aad waa u hanqaltaagga hoggaaminta dalka, tan 2aad waa rag aqoonta diintu ku yar tahay oo waxay aaminsan yihiin quraafaad iyo sixir. 1995kii sheekadii *“Danley iyo ilma Dahabo Toolmoon”* ee ku soo bixi jirtay wargeyska Xog-ogaal waxaa ku qoray, hoggaamiye kooxeedyadu inay aad ugu dhega-nugul yihiin talada kuhaannada ee ku dhisan quraafaadka, waxay kula taliyeen si ay yoolkooda ku gaaraan oo madaxweyne u noqdaan, waxaa sixir-fur u ah inay marka hore midigta ku dhigaan: (*Caano baqal & carrab yaxaas, waraabe rabaayad ah, sambab malaay, xaar-mas, ilxayr baranbaro, xameeti geel, maskan umul 80 jir ah, qardhaas ku qoran Towreed iwm*). Weli waxay goobayaan oo ku mashquulsan yihiin helitaanka waxyaabaha kuhaannadu ku sheegeen inay sixir-furka u yihiin hannashada hoggaaminta dalka.

Walow jallaafada Ethiopia ay wax kasta ka xoog badan tahay, haddana Muslim iyo Gaalo, Madow iyo Caddaan samatabixinta Soomaaliya waa loo soo gurmaday, waxaa dalka dibediisa lagu qabtay ugu yaraan 15 shir oo loo agaasimay dib-u-heshiisinta ururada Soomaaliya ka amar-ku-taagleeya. Shirkii ugu horeeyey oo lagu qabtay Jabuuti, 21/07/1991kii ayaa Mudane Cali Mahdi Maxamed loo doortay madaxweyne ku meel gaar ah muddo laba sano ah, waxaa lagu soo afjaray oo lagu qatimay shirkii 15aad oo lagu qabtay Mbaghti-Keenya, 10/10/2004 oo Kornayl Cabdullaahi Yuusuf Axmed loo doortay madaxweyne muddo shan sano ah.

15kii shir ee daafaha dunida lagu qabtay waxay noqdeen madhalays aan wax natiijo ah laga macaashin, shir kasta waxaa lagu ebyaa oo lagu soo bandhigaa waxaa hoggaamiye kooxeedyadu ku magacaabaan Axdiga ku-meel-gaarka ah oo ah dastuur qodobadiisa aad loo qurxiyey, balse aan weligi la dhaqangelin. Meesiga gammaanka waa saddexda qoob garaangir ee loo yaqaan (fardaha, baqlaha & dameeraha) marka la layli barayo ama la rarayo danan iyo qaylo dheer ayey isku daraan, hasa ahaatee marka libaax ama waraabe cunayo way aamusaan, sababatu maxay tahay? Nafley la cunayo inuu aamuso oo ah arrin mujiso ah, dadka loo yaqaan (ahlu caqli wal qiyaas) markay ka fekereen sababta gammaanku la aamuso marka dugaagu cunayo, waxay ku qiyaaseen inay faraxsan yihiin oo ay leeyihiin kuna tasbiixsanayaan *“laba lugoodle ayaa i dhibay oo rar iyo fuullimaad isugu key daray ee adaan isku nahay afar lugoodle ee iska key cun walaal”*

Sidaas oo kale waxaa lays weydiiyey sababata hoggaamiye kooxeedyadu ay u dhaqan gelin waayeen dhowrkii Axdi ku-meel-gaar ee ay diyaariyeen? Soomaalida fekerta ee loo yaqaan (ahlu caqli wal qiyaas) markay ka baaraan-degeen qodobada lagu qeexay dastuurada sababta loo hirgelin waayey isla markaana dalku u yeelan waayey dowlad dhexe, waxay qiyaaseen in hoggaamiye kooxeedyadu ay dalka u dejiyeen dastuur qoraal ahaan dahsoon, balse ficil ahaan si rasmi ah u dhaqan galay.

Dowladii daaqiliga ahayd 1958kii dastuur ku meel gaar ah ayey dalka u dejiisay, 20/06/1961kii ayaa afti dadweyne lagu dhaqan geliyey, wuxuu ahaa dastuur dimoqoraadiyad fowdo ah ku salaysan. MSBarre ayaa dastuurkaas rafacay, markii hore wuxuu ku beddelay 13kii qodob ee Axdiga Kacaanka, mar kale 25/08/1979kii ayaa Kacaanku dejiyey dastuurkii 114 kaasoo lagu sargooyey danaha Kacaanka. Haddaba hoggaamiye kooxeedyada oo muddo dheer ku mashquulsanaa sidii ay u beddeli

lahaayeen dastuurkii MSBarre, shir qarsoodi ah oo ay ku yeesheen meel mugdi ah oo ku taal Ethiopia waxay isku waafaqeen inay dalka u dejiyaan dastuur cusub oo liddi ku ah kii MSBarre. Hoggaamiye kooxedyadu dastuurkii dalka hooyo waxay u qoreen sida hoos ku faahfaahsan:

Dastuurkii dalka hooyo:

- * Soomaaliweyn waxaa beddelay = Soomaali yar-yar
- * Madaxweyne qaran waxaa beddelay = Madaxweynayaal qabiil
- * Jamhuuriyadii Soomaaliya waxaa beddelay = Lixland (Somaliland, Puntland, Hiiraanland, Banaadirland, Bayland iyo Jubbaland)
- * Qaran iyo quwad waxaa beddelay = Qabiil & qaranjab
- * Dowlad dhexe waxaa beddelay = Dagaal-ooge & danayste qabiil
- * Midnimo waxaa beddelay = Tafaraaruq
- * Soomaalinimo waxaa beddelay = Qabyaalad
- * Waddaniyad waxaa beddelay = Walaahow
- * Waddan jacayl waxaa beddelay = Qaxooti jacayl
- * Dan guud waxaa beddelay = Dan gaar
- * Soomaali ha is raacdo waxaa beddelay = Soomaali ha is raamsato
- * Soomaaliyey toosoo isku tiirsada waxaa beddelay = Soomaaliyey kala tagoo is-tumaatiya
- * Dimoqoraadiyad waxaa beddelay = Digtatooriyad
- * Gole Baarlamaan waxaa beddelay = Guurti beeled
- * Xildhibaan waxaa beddelay = Xigdhibaan
- * Guddoomiye urur-siyaaso waxaa beddelay = Tabcane Tigree
- * Wasiir waxaa beddelay = Dilaa-sare
- * Jannan waxaa beddelay = Jabhad
- * Safiir waxaa beddelay = Boos-celis
- * Maxkamadihii dastuurka waxaa beddelay = Maxkamad Islaami beeled
- * Raadiyihii codka Jamhuuriyadda waxaa beddelay = Raadiyaha beesha hubaysan
- * Wargeysyadii qaranka waxaa beddelay = wargeys-yare beeled
- * Minashiibiyo waxaa beddelay = Cabdalle Shideeye
- * Basaboor waxaa beddelay = Isxambaar
- * Wasaarad waxaa beddelay = NGO
- * Banki waxaa beddelay = Xawaalad
- * Lacag qaran waxaa beddelay = Iska daabaco Bilyano
- * Boliis waxaa beddelay = Burcad hubaysan
- * Milateri waxaa beddelay = Mooryaan
- * Ciidankii NSS waxaa beddelay = Jaajuus Ethiopia
- * Koofiyad-Cas (PM) waxaa beddelay = Gaandheri & Istaaf
- * Ciidankii Asluubta waxaa beddelay = Iskaashatada Meyd asturka
- * Xabsi waxaa beddelay = Xabaal
- * Maxbuus waxaa beddelay = Marxuum
- * Saldhig Boliis waxaa beddelay = Rugta Afdubka
- * Amaan iyo iqyaar socod waxaa beddelay = Isbaaro & edeg Ibliis
- * Biri-ma-geydo waxaa beddelay = Baroon ku xasuuq

* Deris-wanaag waxaa beddelay = Dagaal sokeeye

* Siyaasi waxaa beddelay = Qabqable

* Aqoonyahan waxaa beddelay = Dagaalyahan

* Indheergarato waxaa beddelay = Afmiishaar

* Saraakiil waxaa beddelay = Rijaalul Seben

* Ugaas waxaa beddelay = Afarjeeble

* Wayeel taliya waxaa beddelay = Wiil qorileh

* Wada-tashi waxaa beddelay = Teyda-raac

* Samadoon waxaa beddelay = Sun-walaaqe

* Ganacsato waxaa beddelay = Tujaarul Xarbi

* Baayacmushtar waxaa beddelay = Bililiqo iibin

* Mujaahid waxaa beddelay = Mujaahil

* Xaq-u-dirir waxaa beddelay = Xukun-u-dirir

* Halgan waxaa beddelay = Halaag

* Kursi doon waxaa beddelay = Kadeed abuur

* Alle bari waxaa beddelay = Gaalo bari

* Alle ka cabsi waxaa beddelay = Gaalo ka cabsi

* Islaamnimo waxaa beddelay = Afka-baarkiisa

* Diin midaysan waxaa beddelay = Dariiqooyin is diidan

* Wadaad welimeysta waxaa beddelay = Wahaabi shaqaysta

* Caqiido diimeed waxaa beddelay = Caadifad qabiil

* Gabdho guursi waxaa beddelay = Garoob lacag leh

* Goobihii Caweynska waxaa beddelay = Cillaansaar & Casir-legged

* Marwo dumar waxaa beddelay = Majaaf qayisha

* Meher waxaa beddelay = Maxjabad kufsi

* Qudaar cunis waxaa beddelay = qaad raamsi

* Ilka cadde waxaa beddelay = Af-ligis

* Dhaqan waxaa beddelay = Dhalanteed

* Asluub wanaag waxaa beddelay = Anshax-xumo

* Midab dabeeci waxaa beddelay = Kiimikada Diyaana

* Milkiyad maguurto waxaa beddelay = Murugmaarug & Maantaan xoraystay

* Xishood & xalaal miirato waxaa beddelay = Xaabsi & Xaaraan ku naax

* Qalin waxaa beddelay = Qori

* Musuq waxaa beddelay = Marooqsi

* Xeelad waxaaa beddelay = Xoog

* Xukun waxaa beddelay = Xabad

* Caqli waxaa beddelay = Cudud

* Laaluush waxaa beddelay = Leejo

* Nabad waxaa beddelay = Colaad

* Farxad waxaa beddelay = Fajac & amakaag

* Raaxo waxaa beddelay = Rafaad

* Maaweelo waxaa beddelay = Murugo

- * Naallo waxaa beddelay = Naxdin
- * Qosol waxaa beddelay = Qamuunyo
- * Qadarin waxaa beddelay = Quursi
- * Haybad waxaa beddelay = Habacsanaan
- * Sharaf waxaa beddelay = Sharaf-xumo
- * Shaqo waxaa beddelay = Shaxaad
- * Shaqo rag waxaa beddelay = Shaari-shaari dumar
- * Masruuf waxaa beddelay = Mahayo
- * Tacab waxaa beddelay = Tuugsi
- * Gobanimo waxaa beddelay = Gunnimo
- * Himilo waxaa beddelay = Hungow
- * Heshiis waxaa beddelay = Hagardaamo
- * Qaddiyad waxaa beddelay = Qalalaase
- * Jaangooyo waxaa beddelay = Jaantaa-rogan
- * Qorshayn waxaa beddelay = Qarqoosh
- * Maamul waxaa beddelay = Muran
- * Daryeel bulsho waxaa beddelay = Dil-dhac-kufsi
- * Cadaalad waxaa beddelay = Jowrfal
- * Xuquuqul iinsaan waxaa beddelay = Gaboodfal
- * Gar waxaa beddelay = Gardarro
- * Sinaan waxaa beddelay = Kala-sarayn & qabiil ku faan
- * Horumar waxaa beddelay = Burbur & barakac
- * Barwaaqo waxaa beddelay = Cagabarar
- * Daawo waxtar leh waxaa beddelay = Dambaska Hindiya
- * Daaweyn dhaqtar waxaaa beddelay = Dollar mahaysaa
- * .Caafimaad waxaa beddelay = Cudur & daacuun

- * Reer Magaal waxaa beddelay = Reer Miyi
- * Feer magaalo waxaa beddelay = Fargan leeb
- * Gibilcad waxaa beddelay = Gibilmadow
- * Mag ama diyo waxaa beddelay = Bac-madow
- * Bilic iyo ubax waxaa beddelay = Qabri iyo qashin
- * Xamar-weyne waxaa beddelay = Xamar-jadiid
- * Suuqii Ceelgaab waxaa beddelay = Suuqa bakaaraha
- * Baar waxaa beddelay = Buush
- * Ambalaas waxaa beddelay = Gaarigacan
- * Taksile waxaa beddelay = Umul-gaad
- * Socodka baabuurta, seedkii midig waxaa beddelay = Seed bidix
- * Dhiil waxaa beddelay = Caag
- * Dambiil waxaa beddelay = Bac

- * Aqoon waxaa beddelay = Jaahilnimo
- * Aqoon-dirsi waxaa beddelay = Agoon-dirsi
- * Xoolo-dhoofin waxaa beddelay = Dad dhoofin
- * Moos dhoofin waxaa beddelay = Dhuxul dhoofin
- * Galley beeris waxaa beddelay = Xashiis beeris

- * Caano xoolaad waxaa beddelay = Caano Boore
- * Duur-joog (ugaadh) waxaa beddelay = Digaag
- * Naq & doog waxaa beddelay = Nabaadguur & Geed Yuhuud

- * Talyaani waxaa beddelay = Tigree
- * Rooma waxaa beddelay = Adis Ababa
- * Somali State waxaa beddelay = Kilinka 6aad ee Ethiopia

Tacab Shiidle:

Nabi MUXAMED-nnkh- wuxuu yiri “qofkii wax wanaagsan jideeya, wuxuu leeyahay ajirkeeda iyo dadka ku raaca ama uga dayda ajirkooda oo kale. Qofkii munkar iyo xumaan jideeya wuxuu helayaa dembigooda iyo dadka ku raaca ama uga dayda dembigooda oo kale”. Haddaba 30ka urur-qabiil ee Adis Ababa lagu aas-aasay ajar iyo eedba waxaa loo nisbayn doonaa Kornayl Cabdullaahi Yuusuf Axmed oo ah sarkaalkii ugu horeeyey ee hoos galay Mingiste isla markaana bilaabay hawsha jabhadaynta. Rag badan ayaa hidde raacay dhabbihii Cabdullaahi Yuusuf jeexay, waxayna dalka u horseedeen qabyaalad, qalalaase iyo qaranjab. Cabdullaahi Yuusuf inuu beddelo MSBarre waa mucjiso maanka fayow diidan yahay iyo waxaan la sugayn oo weliba aan la sii saadaalin.

Maamulkii MSBarre waxaa araxda jebiyey guuldaradii dagaalkii 77, kadibna waxaaba muran iyo mugdi galay midnimadii jamhuuriyadda Soomaaliya. Walow MSBarre weysadu ka jabtay oo uu arjarkiisii cunay, macnihii wanaagii uu falay iyo waxqabadkii Kacaanka, wuxuu ka dambaysiiyey jowrfal iyo jarriimooyin waaweyn, haddana MSBarre wuxuu ahaa hoggaamiyihii ugu waxqabadka badnaa ee abid soo mara maamulka Soomaaliya, laga soo bilaabo 07/05/1956 oo ku beegan maalintii Cabdullaahi Ciise loo dhaariyey RW dowladdii daaqiliga ahayd ee maamulkii {AFIS}.

Laga soo bilaabo yaaraantiisii markii askarta loo qoray MSBarre wuxuu ku fekeri jiray oo bartilmaameed u ahayd inay taariikhda u gasho hoggaamiyihii Soomaaliya ka hirgeliyey saddex arrimood, runtii waa ku tallaabsaday taabagelinta saddexdii, ayaandarrose saddexdiiba waa ku guuldaraystay, waayo MSBarre markuu wax qabanayo wuxuu oran jiray muruqeenna iyo maskaxdeenna ayaan ku meelmarinaynaa ee halhays uma lahayn Insha-Allaah iyo idinka Eebbe ayaa lagu fulinayaa. Libin ninkii holliya ayaa hela, saddexdii arrimood ee MSBarre ku dadaalay inuu fuliyo, waxay kala ahaayeen:

(1) MSBarre markuu talada la wareegay, wuxuu mudnaata hore siiyey inuu saddexdii gobol ee xilligaas ku jiray gacanta Gumeysiga (Somali Galbeed, NFD iyo Jabuuti) ka xoreeyo heeryada Gumeysiga, lana unko Soomaaliweyn xor ah oo hal calan leh. Marka la qiimeeyo sidii Kacaanku u garab istaagay jabhadihii gobanima-doonka, MSBarre waxaa loo aqoonsan doonaa xoreeye guuldaraystay {Defeated Liberator}. Runtii dadaalkiisii ku wajahnaa xoraynta Soomaali Galbeed illaa xad waa ku guulaystay waxaase burburiyey

oo araxda jebiyey quwaddii Bahdii Warso Bari, hobollada Waaberi ayaa ku heesay
“Galbeed waa la xoreeyey Waarsaa gaagixisay”

(2) Marka la yagleelo oo seeska loo dhigo Soomaaliweyn xor ah, wacyigelin iyo baraarujin kadib in garaadka bulshada kor loo qaado oo laga xoreeyo hanqaltaagga maamul jacaylka ku dhisan ee siyaasiyiinta gobolka Woqooyi-Bari SSDF. Habeenkii talaadada 21/10/1969, Baarlamaan ku sheegi Soomaaliya wuxuu ka doodayey ansaxinta in Muuse Boqor ka dhaxlo jagada madaxweynaha ina-adeerki Cabdirashiid Cali Sharma’arke. Gabay xigmad leh ayaa waxaa ka mid ah (*dowladnimadii maxaa ka dhigay boqor dumaal yeeshay*). Inqilaabkii MSBarre talada dalka kula wareegay runtii wuxuu ahaa guul taariikhi ah, marka la qiimeeyo hadafkii sebenkaas taagnaa ee nuxurkiisu ahaa Boqortooyadii reer Bosaaso in dib loo soo nooleeyo, MSBarre wuxuu ahaa Mahdi Alle u soo diray samata-bixinta Soomaalidii dulmanayd.

Dadaalkii xiriirsanaa 21ka sano wuxuu noqday hal bacaad lagu lisay, waxaa muuqata in MSBarre ku guuldaraystay inuu Soomaali ka xoreeyo reer Garowe, maxaa yeelay 15 sano oo halgan hubaysan lagu doon-doonayey cadaalad iyo xorriyad kadib, 10/10/2004 Xildhibaanada beelaha Soomaalidu waxay cod aqlabiyad ah ku doorteen Kornayl Cabdullahi Yuusuf Axmed oo Soomaali saqiir iyo kabiir ka wada dheregsan tahay taariikhdiisa madow. Halgankii la galay biyo-dhaciisu ma wuxuu la mid noqday, xamiladii dhibkii foosha dhaliweyday ee saygeedii jamatay? Nin baa yiri, laba walba waa isa saaray ee laba tagoogood isma saarin. Abshir Bacadle oo la kulmay xaalad la mid ah yaabka yaabkiise iyo qaraw riyo maalmeed, ayaa ku shirbay: *Kundishe aani kadib miyaa la keenay Keenadid labaad?*

1960-yadii beel yar oo ku dhex noolayd Abgaal oo magaceedu ahaa Galgalo ayaa loogu waqlalay Nuux Maxamuud Sulaymaan, waxaana loogu abtiriyeey haybta Majeerteen. Nin beesha Galgalo u dhashay ayaa ka haajiray degmada Geeddi Xayr, wuxuu degay Garowe, muddo markuu ku noolaa degaankaas, wuxuu doonay oo u gogol fariistay gabadh Majeerteen ah, si dadban ayaa loogu diiday waxaana lagu yiri “boowe magaca Nuux Maxamuud Sulaymaan ha ku deeqo”. Ninkii ayaa fahmay abtirsigii loo laqimay inuu ahaa afka baarkiisa aan markii horeba uurka jirin, dabadeed markuu ku hungoobay hiyiraacii haybta Majeerteen oo yaqiinsaday inuu ku tolan yahay Abgaal, wuxuu ku shirbay “*Habaar-qabaa i hoojiyee ninkii i hayn jirow i hoo*”. Sidaas oo kale dadaalkii MSBarre oo dhicisoobay wuxuu la mid noqday Tacab-Shiidle, waayo qofka xuquuqda ka maqan yaqaan ayaa loo doodi karaa. Doorashada Cabdullaahi Yuusuf waxay la mid tahay Soomaali oo tiri “*MSBarre ayaa na hodaye, ninkii noo talin jirow noo tali*” Walow maamulkii MSBarre laga dhaxlay guuldarro baaxadweyn taasoo laga sheekayn doono jiil ka jiil, isla markaana dhibaata hadda taagan inteeda badan turxaanteed uu beeray, mas’uulna ka yahay mushkiladaha murugsan, haddana wuxuu mudan yahay in loo dhiso *Tallo Dahab ah*, taariikhdiisana lagu darro manhajka dugsiyada waxbarashada, sababtoo ah wuxuu ahaa geesigii tirtiray oo Soomaali ka badbaadiyey far-ku-sheegtii **Cusmaaniyada**, wuxuu kaloo isku dayey kuna dadaalay inuu horjoogsado damaca waalan iyo hanqaltaaga hoggamin jacaylka reer Garowe.

(3) 21kii sano ee maamulka MSBarre socday, wuxuu la kulmay barwaaqo xad-dhaaf ah, dunida waxaa ka jiray dagaalkii qaboobaa iyo barwaaqadii Khaliijka Carabta {Oil boom}. Juqoraafi ahaan Soomaaliya oo ku taal meel muhiim ah, waxay suurtagelisay in quwadaha waaweyn iyo Carabta lacagta leh ay macaawino xad-dhaaf ah siiyaan Soomaaliya. 21kaas sano waxaa lagu tilmaamaa sebenkii baraaraha Soomaaliya, dibna loo arki mayo. MSBarre isagoo aan oran Insha-Allaah wuxuu go’aansaday oo si ficil ah ugu tallaabsaday in beesha Mareexaan gorofta cayrta tuurto oo dhamaantood ay barwaaqo dhex dabaashaan, wuxuu ka simay sarkaal sare iyo maalqabeen, 21kii sano dhaqaalihii waddanka soo galay 80% waxaa qaatay beelaha MODH oo Mareexaan hormood u ahaa. MSBarre intii uu ku xanuunsanaa Lagos-Nigeria, raggii Mareexaan ee ka agdhowaa waxay isku soo qaadeen in duqa daaweyn loo geeyo isbitaalada hore-umaray sida {Germany & USA}, waxay isku afgarteen in tujaarta Mareexaan mid kasta laga qaado ugu yaraan toban kun oo dollar si daaweyn casri ah loogu helo Xaajiga xanuunsanaya. Ayaandarro Bashiir Yarow kali ah ayaa qaaraan-wadaagii \$10.000 bixiyey, intii kale waa laga waayey hagar iyo hanti la’aan mid ay ka ahaydba.

Ka dar oo dibi dhal. Dagaalkii Xadka iyo Xawaaraha ee Maleeshiyada MFCaydiid ay Abriile 1992kii ku qabsatay gobolka Gedo, wuxuu horseeday dagaal cusub oo dhexmaray SNA & SNF. Dagaalyahanno Mareexaan ah ayaa dullaan rogaal celis soo qaaday, 12/10/1992 waxay SNA ka qabsadeen magaalada Baardheere, Mareexaan rag iyo rasaasba waa haystay, laakiin waxaa ciriiri uga jiray saadka iyo shidaalka. Waxay kaalmo dhaqaale weydiisteen beelihii ay isku qadiyadda ahaayeen xilligaas, waxaa la yaab lahayd, 21kii sano ee Mareexaan barwaaqaysnaa, Majeerteen qaxooti ku ahaa Bariga Afrika inay bixyeen saadkii iyo shidaalkii Mareexaan ku dagaal galay. Yaraantaydii gobollada dhexe waxaan odayaasha ka maqli jiray iyagoo ku sheekeeya “Gabadha Mareexaan waxay dhashaa wiil dirac ah oo dagaalka ku firfircoon, laakiin guriga ay

gasho xooluhu kuma bataan”. Maalkii Mareexaan helay 21kii sano meel uu jaan iyo cirib dhigay lama yaqaan, kaba sii darane hantidii maguurtada ahayd (beero & guryo) 80% waa iska iibiyaan. Ayaandarro hantidii Mareexaan tacbay Alle kama dhigin bir ee baraf bay noqotay. Sida muuqata burjiga Mareexaan wuxuu ku dhisan yahay shar iyo dagaal laakiin maal iyo mushtar midna shaqo kuma leh.

Cutubka 11aad: Adeegayaasha Ethiopia:

Belaayada ugu darran iyo dhibaataada ugu culus ee bulsho soo foodsaarta, waxay tahay markay isku dhex yaacdo oo la kala garan-waayo: danta guud iyo danta gaar, nacabka iyo nasteexa, cadowga iyo saaxiibka, shisheeyaha iyo sokeeyaha. Taariikhdu waa mid dhigan, dhambaaley uruurisaa, dhacdiyo mid la dhowrayoba. Muhiimadda ugu weyn ee loo diiwaangeliyo taariikhda, waxay tahay in la barto xumaan iyo samaan wixii dhacay sooyaalka. Waxaa jira hab-dhaqan aadamigu ka siman yahay, kaasoo ah marka cadowgaagu jabo in lagu farxo, maahmaah calami ahna waxay leedahay “*cadowgaaga cadowgiisu waa saaxiibkaa*”. 1920kii goortii Gumeysiga Ingiriisku u itaal sheegtay kifaaxii Daraawiishta ee la jebiyey, Calidhuux oo ku farxay jabka ku dhacday Sayid Maxamed ayaa ku maansooday:

**Darmaan qalay wadaadkii wuxuu duunyo hayn jiraye,
Daaduufka aw Maxamed ku dhacay waan ku diirsadaye,
Waa lagu digtaa duul hadduu ku darnaan jiraye,
Bal dayooy wadaadkii wakaa sii dabayshadaye...**

Cadowgaagu hadduu kufo oo sinbiriirixashada la dhul dhaco, waa lays raaciyaa oo waa la sii tarantureeyaa ee lama toosiyo oo looma shantogo. Ethiopia iyo Soomaaliya caodwtooyo ku salaysan dal iyo diin ayaa qarniyaal dhextiil, waqtiga ayaa saaciday nasiib-wanaagga Ethiopia maanta Soomaaliya waa kuftay oo dhabarka ayey ka jabtay, sidii lagu yiqiin Ethiopia doqon ma noqon ee iyadoo ka faa’idaystay fursadda dahabiga ah, dhaawacii Soomaaliya waa dhiibi-tirtay, waxayna sii raacisay meyd-garaac waxaashnimo oo ka baxsan xeerarka gobanimo-u-dirirka iyo derisnimada. Fekradii Soomaali ha is raacdo iyo halgankii Soomaaliweyn xor ah loogu jiray oo maanta sida muuqata meesha ka baxay, Soomaalida kuftay si aanay mar dambe u soo kicin, Ethiopia waxay jamhuuriyaddii Soomaaliya u qeybisay dhowr Maxmiyadood oo kala madaxbannaan oo weliba col ah, tusaale Puntland iyo Somaliland mid kasta xiriir gaar ah ayey la leedahay. Wadar jeer waxaa laysku deyey in dib loo yagleelo dowladdii Soomaaliya ka burburtay, si qorshehaas looga miro-dhaliyo waxaa la qabtay 15 shir dib-u-heshiisiin, dadaal kasta Ethiopia ayaa fashalisa.

15kii shir, 9 ka mid ah waxaa lagu qabtay Ethiopia, 3 ka mid ahna waxaa lagu qabtay Jabuuti, 2 ka mid ahna waxaa lagu qabtay Keenya, hal shirna waxaa lagu qabtay Masar. Saddexdii shir ee Jabuuti lagu qabtay, 2 ka mid ah waxaa lagu dhisay dowlad (DKMG & TNG), sidoo kale labadii shir ee Keenya lagu qabtay mid baa dowlad lagu dhisay (TFG), shirkii Masarna waxaa lagu dhisay gole maamul ku meel gaar ah, hasa yeeshee sagaalkii shir ee Ethiopia lagu qabatay waxba kama soo bixin, balse mar kasta waxaa Adis Ababa laga abaabulaa danaystayaal dalka burburiya sida kooxda SRRC oo bishii Maarso 2001

lagu dhisay magaalada Hawaas ee Ethiopia. Kooxda SRRC oo fulinaysa dardaarankii Meles Zenawi, mar kasta waxay ku tallaabsadaan qaranjabka Soomaaliya, kooxdani ama waa damiir laawayaal aad u dun xun ama waa Amxaaro Af-Soomaali taqaan, sababtoo ah shirkii OAU ee Lusaka-Zambia lagu qabatay 2003, iyadoo aan lagu marti-qaadin waxaa madashii shirka tegay ergo ka socotay SRRC, waxay codsadeen in calanka Soomaaliya laga siibo fagaaraha shirka oo dhulka lagu tuuro, maadaama xukumadda TNG ee Cabdiqaasim madaxweynaha ka yahay aan loo dhamayn oo aysan Soomaaliya meteli karin, hase yeeshee waa laga diiday oo waxaa loogu caqli celiyey maamulka TNG in JQM ay u aqoonsan tahay dowlad Soomaaliyeed. Ethiopia waxay dagaal-oogayaasha dalka burburiyey ugu deeqday hub xad-dhaaf, waxay kaloo isku soofaysay oo weliba hubaysay inta badan qabaa'ilka Soomaalida si ay isu gumaadaan. Shirqoolka Ethiopia wuxuu ku wajahan yahay in sinjiga Soomaalidu dabargo' si ay u hesho bad iyo berri isku qoofalan oo aan cidina lahayn ama ugu yaraan inay wiiqdo awoodda wax iska caabinta Soomaalida, kadibna laga dhigo qabaa'il cadow isu ah oo Ethiopia hoos taga (kilinka 6aad).

**Dhulka miyaa dadkiisii dhintoo dhaxal la'aan jooga?
Dhulkaanow ma qowm kuu dhashoo ku dhagrayaa jira?**

**Tulud geela ayaa toban ku ruux weydaaye,
Dhulkaan tegay miyaan dhagaxna loo tuuraynin?**

Ethiopia waxay si hawl yar ugu guulaystay inay Soomaaliya ka tirtirto kaadirka indheergartada loo yaqaan sida: aqoonyahannada haybadda leh, saraakiisha kartida leh, dhaqaatiirta taqasuuska leh, culumada diinta iyo wixii soo raaca. Murti baa waxay leedahay bulshadii laga waayo: *waayeel taliya, wadaad duceeya iyo wiil dagaallama*, bulshadaas belaayo ayaa ku habsatay oo burbur baa u sugnaaday, waa heerka maanta Soomaalidu ku sugan tahay. Ethiopia waxay ku talo gashay markay layso oo gebi ahaanba waddanka ka suuliso kaadirka aqoonta leh inay dalka isugu haraan waxmagarato ku dhaqanta xeerka duurjoogta ee ku salaysan sida loo kala xoog weyn yahay in laysu cuno {Survival of the fittest}, xeerkaas Ethiopia dejisay ayaa maanta Soomaaliya looga dhaqmaa oo beeluhu sida ay u kala hub badan yihiin ayey isu bililiqaystaan, waxaa la boobay oo la barakiciyey beelaha aan hubaysnayn sida Banaadiri ama Gibilcad. Hadba dunida dad baa u kaca oo diin cusub la shir yimaada, shirqoolladii Ethiopia u dejisay burburinta Soomaaliya si fiican ayey u hirgaleen. Ethiopia burburinta Soomaaliya ku guulaysatay ayaa ku geeraartay "*halaagga Soomaali hootadaan la helay hoodo iyo nasiib wacan dheh*"

Geed baa hadlay oo wuxuu yiri: Godiney haddaan gabalkey kugu daabnayn sidaa iima goyseen. Ethiopia in aysan naxariis Soomaali u hayn oo u ixsaan falayn waa wax la og yahay oo taariikhda ku xusan, laakiin waxaa ayaandarro laga naxo ah, rag magac Soomaaliyeed leh, balse maankii laga xaday inay ku hadaaqaan Ethiopia tii hore maaha oo waa xabiibkeen, waxayna jeceshahay samaanta iyo samata-bixinta Soomaaliya, wax walba hiil iyo hoo waa nala garab taagan tahay, waxay u geyfan tahay sidii Soomaaliya dowlad ku yeelan lahayd. Waxay kaloo ku hantaatacaan, Jaalle Meles Zenawi waa towri dhalinyar oo maskax furan oo afkaartiisu waa ka duwan tahay Boqorradii Amxaarada iyo

dhiigyacabkii Kornayl Mingiste. Su'aasha isweydiinta mudan waxay tahay Meles iyo Mingiste yey kala yihiin? Meles Zenawi isir ahaan waa Tigree ka soo jeeda boqortooyadii faca weyneyd ee la oran jiray {Axum Empire ama Solomonid Kingdom} waxayna ku abtirsataa Nabi Suleymaan iyo reer bini-Israel.

Boqorradii Tigree ee Ethiopia xukumi jiray waxaa ugu dambeeyey Emperor Teodoros oo 1863kii ismerjiyey naftana iska qaaday, waxaa xilkii kala wareegay Emperor Yohannes IV oo dhintay 1889. Geeridii Yohannes IV waxay soo afjartay boqortooyadii {Axum Empire} ee ilaa qarnigii Caamul-fiil soo jirtay, xilligaas wixii ka dambeeyey Boqor Menelik oo taageero isugu jirtay hiil iyo hoo ka helay boqorradii Ingiriiska (Queen Victoria) ayaa maamulkiisa ku ballaariyey dhulweynaha Ethiopia, wuxuuna xoog ku qabsaday gobollo cusub. Boqor Menelik ka hor boqorradii Ethiopia u talin jiray waxay ahaayeen reer Aksum, waxay kaloo ahaayeen hormoodkii nidaamka dhulgoosiga iyo Gumeysiga, waa boqortooyadii seeska u dhigtay dulmiga iyo kala sareynta Ethiopia weli ka jirta.

Emperor Theodore ayaa 1855kii ku dhaartay inuu Muslimiinta ka tirtiri doono mandaqada Bariga Afrika, mar kale Boqor Menelik ayaa 1887kii markuu qabsaday Harar isna holliyey inuu meelmariyo dhaartii Theodore, Alle SWT ayaa horjoogsaday hindisihi labada Kaafir. Maanta Meles Zenawi oo ka faa'iidayanaya mashruuca loogu magacdaray "*La Dagaallanka Argagaxisada*" oo nuxurkiisu yahay "*La dagaallanka Muslimiinta*" wuxuu wacad ku maray oo weliba u geyfan yahay inuu dib u soo nooleeyo fekradii Emperor Theodore. Bartamihii 1991kii Gaagaabta loo yaqaan Tigree ama jabhadda TPLF markay xukunka Ethiopia la wareegeen, Meles Zenawi wuxuu go'aansaday inuu dib u yagleelo oo boorka ka jafo afkaartii boqortooyadii {Axum Empire}, laga soo bilaabo 1991kii wixii dhaqaale dalku helay (gudaha & dibeddaba) waxaa loo weeciyey dhismaha iyo horumarinta gobolka Tigree, dalka intiisa kalena waa la dayacay.

Kornayl Mingiste H. Mariam isir ahaan wuxuu u dhashay beesha **Kulo-Konta** oo taliskii Mingiste ka hor ahaan jirtay addoomo Amxaaradu leedahay, sida xoolaha ayaa suuqa lagu kala iibsan jiray, sharaf iyo karaamo weligood ma yeelan. Mingiste aabbahiisa ayaa ahaan jiray addoon Xayle Salaase, taasina waxay suurtagelisay inuu waxbarto oo ciidamada loo qoro ee beeshiisa waxbarasho iyo shaqo fiican midna looma oggolayn waayadii hore. Marka aan su'aashii dib u soo celiyee, Meles iyo Mingiste keebaa Gumeyste ah? Keebaa Kacaan ah oo u guntaday inuu wax xoreeyo? Jawaabta waxaa laga sugayaa Kaadirka Ethiopia ee ku andacooday Meles Zenawi waa saaxiib daacad ah, wuxuuna sutigaashaan ugu jiraa samatabixinta Soomaaliya. Xabashidu waa xabiibka Soomaalida waxay ka dhigan tahay, Yuhuuddu si daacadnimo ah ayey Carabta u jeceshahay. Meles Zenawi ayaa dadaal ugu jira horumarinta danaha Soomaaliya waxay ka dhigan tahay, madaxda xisbiga Likud ee Israel (Shamir, Sharon & Natanyahu) waxay har iyo habeenba heegan ugu jiraan daryeelka danaha reer Falastiin. Waxay kaloo ka dhigan tahay, Fircoonka cusub ee sebenkan soo baxay {George W. Bush} wuxuu ku dadaalaa daryeelka danaha Muslimiinta iyo horumarinta caqiidada Islaamka.

1989kii ayaa xukunka laga qaaday hoggaamiye P.W.Botha oo ahaa cunsuri si dhab ah u aaminsan nidaamka Midab-kala-sooca {Apartheid} ee dalka Koofur Afrika ka jiray xilligaas. Waxaa beddelay oo xilkii kala wareegay F.W. Dekler oo ahaa qunyarsocod aaminsan in dadka madow si dadban loogu maamulo midab-kala-sooc la huwiyey sir iyo dibindaabyo dahsoon. Baadariga Desmond Tutu oo muddo dheer u halgamayey xaqa dadka madow iyo burburinta nidaamka kala sareynta, ayaa nin weriye ah wuxuu weydiyey: F.W. Dekler oo ah {moderate} sow kama fiicna oo dadka madow uguma roona P.W. Botha? Desmond Tutu oo dhoolla-caddeynaya ayaa ku jawaabay: F.W. & P.W. waa xarfo Ingiriis ah, labada hoggaamiyena waa niman caddaan ah. {F.W. & P.W. are English alphabets and both leaders are whitemen}. Sida Desmond Tutu oo kale waxaaan leeyahay Meles & Mingiste mid waa Tigree, midna waa addoon Amxaar, labaduba waxay neceb yihiin jiritaanka Soomaaliya xor ah. Nin la oran jiray Nuur Laangare ayaa ku maansooday: *“Maxaan laba Gaaloo abtirsiiyo gudboon... Midna aan u gumeyn, midna aan u gobeyn”*

Ilowshiiyo dhowaa ma umulbaa:

Gabyaa la oran jiray Salaan Carrabey ayaa ku maansooday *“dumarkuba xublaha foosha way xanaf wareeraane, balse inay xusuusdarran yihiin xaylka kale mooge.”* Raggu markay carruurta dhalayaan waxay ku jiraan raaxada ugu sareysa, dumarkuna xilliga foosha waxay la kulmaan xanuunka ugu badan, xaalad nolol iyo geeri u dhaxaysa ayey ku sugan yihiin. Dhaqaatiirta haweenka umuliya ayaa waxay ka fekereen sidii ragga loo dareensiin lahaa xanuunka foosha, dhowr tijaabo kadib waxay go'aamiyeen marka hawentu foolanayso, ninkeed oo xarig siriq leh xiniinyaha looga xiray inuu dhinaca ka fariisto, mar kastoo xanuunka fooshu qabto hawentu waa inay xariga xoog u jiidaa oo weliba jafaalisaa. Dhaqaatiirtu waxay isku waafaqeen in habkaas ragga loo dareensiin karo xumadda iyo kulaylka foosha. Gobol dalka Hindiya ku yaal ayaa laga hirgeliyey tijaabadaas waana lagu guulaystay, waxaanse jeclaan lahaa in tijaabadaas Soomaaliya laga dhaqangeliyo. Xaamiloo kastoo la xanuunsata kulaylka foosha, 40 ayaamood kadib waa illowdaa xanuunkii ay soo martay, waxayna sameysaa is qurxin iyo cillaansaar iyo cadar is marin, si ay dareenka himadda saygeed u soo jiidato.

Hab dhaqanka Soomaalida waxaa lagu meteli karaa umul afartan baxday, waa bulsho war ku nool ah {oral society} xumaan iyo samaan waxba lama diiwaangeliyo, dhibaataadii shalay dhacday degdeg baa loo illoobaa sida haweenku xanuunkii foosha u illoobaan oo kale. 1988kii dad ka qaxay Woqooyi Galbeed ayaa xeryo qaxooti looga ooday Xarshin, Harta Sheekh iyo meelo kale oo ku yaal dhulka Soomaali Galbeed ee Xabashidu gumeysato, qaxootigii ka cararay Hargeysa waxay miciinsadeen walaalaha Soomaali Galbeed, ee uma tallaabin gobollada Makale iyo Shawa. Sidoo kale 1991kii dad ka qaxay Koofurta Soomaaliya ayaa xeryo looga ooday dhulka NFD ee Keenya gumeysato, waxay miciinsadeen Soomaalida NFD ee uma tallaabin Galbeedka Nairobi iyo Harooyinka. Qaxootigii yaacay qaar baa ku sii hakaday Nairobi & Adis Ababa, markay laaluush iska bixiyeen waxaa u suurtagashay inay uga sii dhoofaan waddamada Yurub & Ameerika. Soomaalida oo taariikhyan aaminsanayd Xabashidu inay tahay dugaag dadka cuna, waxay Adis Ababa ka heleen soo dhoweyn iyo naxariis kooban balse mar kasta ka fiican arxamdarrada Carabta, taasina waxay dhalisay in Soomaalidu si fudud ku illowdo

cadaawadii soo jireenka ahayd ee kala dhexaysay Xabashida. Haddaba qof Soomaaliyeed oo qaangaar ah inuu ku andacoodo Xabashi ayaa Soomaali xabiib u ah waa mucjiso maanka fayow diidan yahay. Cadowtooyada Xabashidu u qabto Soomaalida waa mid aad u fog, aadna u qoto dheer, muddo qarniyo ahna soo jirtay, waa cadaawad dowladihii soo maray Ethiopia weligood aysan isku khilaafin kana mideysan yihiin.

Waxaa caalamka ka dhaca is beddelo dhinacyada siyaasadda iyo madaxda maamulka sare saameeya, is beddelkaasoo xilliyada qaar suurtageliya isu soo dhowaanshaha laba shacab oo markii hore colaad ba'ani ay ka dhaxeysay. Walow maamulladii Soomaaliya soo maray ay Xabashida u muujiyeen niyadsami, haddana Ethiopia marnaba kama debsin mowqifkeedii cuskanaa cadawtooyada iyo ka horjeedka midnimada qowmiyadda Soomaalida. Cadowtooyadaas gaamurtay oo illaa qarniyo soo taxneyd ayaa waxaa ka abuurmay dagaallo culus oo laga xusi karo kuwii ugu caansanaa:

* Waqtigii ugu dambeeyey ee maamulladii boqortooyadii IFAT ay ka jirtay carriga Soomaali Galbeed, ayaa boqorkii Xabashida ee la oran jiray Negus Yeshaq (1414 – 29), wuxuu cagtamariyey dhulkii maamulka Islaamku ka jiray, duullaankii Negus Yeshaq soo qaaday 1415 wuxuu ku dilay boqorkii Muslimiinta ee la oran jiray Sacaadu-diin. Taariikhyahannadu waxay sheegeen guushii Kirishtaanka Ethiopia ka soo hooyeen dagaalladii ay la galeen Muslimiinta inay farxadii damaashaadka ka tiriyeen heeso iyo buraanburo uu ku jiray magaca Soomaaliya, iyadoo waqtigaas reer Galbeedku ku tilmaameen markii ugu horeysay taariikhda ee la maqlay magaca Soomaali, waxayse aniga iigu muuqataa been-abuur aan beyd run ka ahayn, waayo qowmiyadda Soomaalida waxay geeska Afrika deganayd afar qarni ka hor dhalshadii Nabi Ciise *cs*.

* Iimaam Axmed Ibraahim Al-Qasaali (1506-43) loona yiqiin Axmed Gurey wuxuu weerar ba'an ku qaaday Xabashida, hoodo wanaag darteed, wuxuu ku guulaystay inuu jebiyo Xabashida oo waagaas ka hor lahaan jirtay gacansarayn suurtagelisay in Muslimiinta Ethiopia lagu soo rogay lagana qaado canshuur. Axmed Gurey oo ku barbaaray nawaaxiga Harar, wuxuu u guntaday una istaagay inuu badbaadiyo dadka iyo diinta Islaamka oo waayadaas ka sii lacifaysey arlada Xabashida. Wuxuu markii horeba abaabulay iskuna dubariday ciidamo laxaad leh oo u badnaa dhallinyaro Soomaaliyeed oo si geesinimo leh ugu babac-dhigay cadowga Xabashida. Bilowgii horeba wuxuu diiday canshuurtii Muslimiinta laga qaadi jiray, taasina waxay lama huraan ka dhigtay inay dagaal fooda is-daraan ciidamadii Axmad Gurey hoggaaminayey iyo kuwii uu horkacayey boqor la oran jiray Lebna Dengel iyo guddomiyihii Xabashida ee gobolka Bali, waxaana si ba'an loo jebiyey ciidamadii Lebna Dengel. Guulihii dagaal ee Axmed Gurey gaaray 1529-1535 suurtagal iima ah inaan sadaradaan ku faahfaahiyo, waxaase ka mid ahaa dhulkii Xabashida laga qabsaday gobollada: Shembera-kure, Dawaro, Shawa, Lassta, Baali, Hadya, Sidamo, Gurage iyo goobo kaloo muhiim ah..

1535 – Markii ciidamada Axmed Gurey qabsadeen dhamaan Bartamaha & Koofurta Ethiopia, wuxuu weerarey isla markaana gacanta ku dhigay gobolka Tigree, isagoo uga sii gudbay illaa deegaanka Woqooyi Galbeed Kasala illaa uu dhinaca ku qabtay Saldanadii Muslimka ahayd ee *Mazagna* oo madax ay ka ahaayeen qabiilka Beeja oo ku taal xadka Suudaan. Muddadii dhowr iyo tobanka sano ahayd ee Axmed Gurey

Xabashida xukumayey waxuu baday oo ay ka maageen inay wax dab ah shitaan habeen iyo maalin toona, iyagoo ka cabsanayey geesiyiinta Soomaalidu inay qaaca dabka soo bidhaan-raacaan, sidaas awgeedna ay Xabashidu illaa maanta hilibka ceerin u cunaan. Jabkii gaaray darteed, waxaa Xabashida u soo gurmaday ciidamo ka yimid dalka Bortaqiiska ka dibna jabiyeey ciidamadii Axmed Gurey. Hadaba jabkii Axmed Gurey u geystay ilbaxnimadii Boqortooyadii {Axum Empire} ee faca weyneyd ayaa ah unuga cadowtooyada Xabashidu uurka ugu hayso Soomaalida, waxaana ka go'an in aysan qancayn illaa iyada iyo Soomaalida mid laga taqaluso, maanta Xabashidu si ay yoolkaas ku gaarto waxay isticmaashaa xoog iyo xeelad kastoo suurtagal ka dhigi karta tirtirista sinjiga Soomaalida.

* Soomaalidu kuma jirin dalalkii Afrika ee Gumeysteyaasha reer Yurub ku kala qeybsadeen Shirkii Berlin sannadkii 1884kii, maxaa yeelay waxay maamul ahaan Soomaalidu ka tirsaneyd boqortooyadii Islaamka ee Cusmaaniyiinta Turkiga. Haddaba markii Masaaridu ka baxday Harar, Seylac iyo dhammaan magaalooyinka ku teedsan Badda-Cas ee ay fadhiyeen sannadkii 1886kii, waxaa mandaqadda Harar qabsaday ciidamadii Boqor Menelik ee uu abbaanduule ka ahaa Ras Makonen. Qabsashadii Harar oo lagu tilmaamay mid ka dhalatay dayacaadii Masaarida iyo hoosaasinta Ingiriiska, kadib Boqor Menelik ayaa sannadkii 1887kii warqad u diray Ingiriiska isagoo ku yiri: “Alle mahadi waxaan jebiyey Amiir Cabdullaahi oo ku baxsaday faras dushi, wuxuu ahaa Axmed Gurey kale oo sebenkan soo baxay. Caasimaddisii Harar waxaa si buuxda ula wareegay ciidankeyga, waxaana ka taagay calankeyga, iyadoo laga sifeeyey maamulkii Muslimiinta. Amiir Cabdullaahi mar dambe ma waxyeelleyn doono Kirishtaanka, dhul Muslimku leeyahana mandaqadaan kama jiri doono”

* 1948-49 Golaha loo dhan yahay ee JQM waxaa looga dooday aayaha waddamadii laga kiciyey Fajiistadii Talyaaniga. Waayadii doodu ka socotay xarunta JQM, Boqor Xayle Salaase wuxuu geed dheer iyo geed gaabanba u koray oo weliba xawli orod iyo xusulduub u galay in Soomaaliya iyo Ereteria federal ahaa loo raaciyey Ethiopia. Damaciisii ku wajahnaa Ereteria waa u meelmaray balse kuma guulaysan inuu Soomaaliya wada liqo. 07/05/1956 markii Cabdullaahi Ciise loo dhaariyey RW dowladdii daaqiliga ahayd, Boqor Xayle Salaase taasi waa u cuntami-weyday, wuxuuna ku dadaalay inuu horjoogsado dowladdii ka dhalatay Koofurta Soomaaliya, wuxuu kormeer shaqo ku kala bixiyey dhulweynaha Soomaali Galbeed, 25/08/1956 khudbaddii uu ka jeediyey magaalada Qabridaharre, wuxuu yiri “qowmiyadda Soomaalidu isir ahaan waxay ka mid tahay qowmiyadaha Ethiopia, sinaba ugama go’i karto, dadka ku hawlan dowlad ka dhalata Soomaaliya waxay ku jiraan riyo maalmeed aan taabagal noqon karin... Soomaali gobanimo heshay waa dameer geesa yeeshay ”

* Xabashidu waxay liqi-weyday laba gobol oo midoobay inay yagleelaan dowlad Soomaaliyeed oo u hawlgeli doonta mideynta Soomaaliweyn iyo is raaca shanta Soomaaliyeed, xorriyaddii lixdankii Xabashidu waxay u aragtay halis ku soo fool leh danaheeda gumeysi. Sidaas awgeed Xabashida waxay go’aansatay inay ka hortagto hanaqaadka dowladdii dhalatay 01/07/1960kii, waxayna weerar saf-ballaaran ah oo cir iyo dhul ah ku soo qaaday Soomaaliya bishii Febraayo 1964kii. Alle ma taageero kibirka iyo gardarrada, Xabashida oo isku magacawda Libaaxyada Afrika darteed, adduunweynuhu wuxuu aaminsanaa in Xabashidu si fudud ku qabsan doonta Soomaaliya, hase yeeshee Xabashidii soo duushay ayaa dagaalkii lagu jebiyey, Libaaxyadii Afrikana waxaa laga dhigay daayeer dullaysan. Hobollada qaranka ayaa ku heesay “**Xaduuda gadaaman ee Gaalku sameeyey, inaan ka gudbayno waan garanaayee, Geyshkayagow guulaysta**”

* Todobaatan iyo todoba gu’ baa taaha la hayaa, markay taadu soo gashaa taabka la qabtaa ! Laga soo bilaabo 1950-yadii dowladii daaqiliga ahayd, Soomaalidu waxay hanti lahayd (mood & noolba) waxaa loo weeciyey unkidda iyo horumarinta CQS, si loo xoreeyo gobolladi ku jiray gacanta Gumeysiga, lana najaxiyo himiladii mideynta Soomaaliweyn. 1970-yadii CQS ee Soomaaliya waxaa loo yiqiin ciidamada ugu

firfircoon qaaradda madow {Best Black Army}, tayo iyo tababarba waxay gaareen heer sare. Sidaas awgeed, sannadkii 1977 Soomaaliya waxay guluf milateri, weerar cir iyo dhulba ku qaaday ciidamadii Xabashida ee fadhigoodu ahaa dhulka Soomaali Galbeed. CQS waxay si fudud u burburiyeen awooddii ciidamada Xabashida, waxayna muddo gaaban ka xoreeyeen 90% dhulka Soomaali Galbeed, iyagoo sida biriqda xowli ku jiiray dhufeysyadii Ameerikaanku u dhisay ciidamada Xabashida, Godey illaa Kaaraa-mardha, halkaasna waxaa lagu jebiyey ciidamadii loo yiqiin Libaaxyada Afrika, iyadoo intii rasaastu leeftay mooyee intii kale laga dhigay maxaabiis dullaysan. CQS oo Addis-Ababa kaabiga saaray una jirsaday wax ka yar 50 kilomitir waxay cabsi ba'an ku abuurtay Xabashida oo sidii lagu yiqiin u habarwacatay quwadaha Kirishtaanka, kadibna waxaa u soo gurmaday Bahdii Warso-Bari.

Xabashida oo ku faanta inay tahay dowlad fac weyn oo aan weligeed la gumeysan isla markaana leh ilbaxnimo iyo xadaarad fog, waxaa u suurtagashay inay isticmaasho saxaafadda afka dheer ee Yuhuudda, lana hirgeliyo tookha iyo islweynida Xabashida. Ummaddaha madow waxaa laga dhaadhiciyey inay yihiin daayeer ducufo ah, Xabashiduna tahay libaaxyo sare oo laga haybaysto. Josoph Geobles wasiirkii warfaafinta ee Naziga ayaa laga soo xigtay inuu yiri “ ku celceli beenta illaa la rumasyto”. *Been fakatay runi ma gaarto !* Beentii saxaafadda Yuhuuddu faafisay ee ahayd Xabashidu waa Libaaxyada Afrika, waxay dhalisay in dadyowga madow ay gorodda laalaadiyaan oo ay ka cabsadaan Xabashida, balse taasi liddigeed Soomaalidu si ba'an ayey u yastaa Xabashida, waxayna u taqaan *Amxaaro injirley* iyo wax liita. Soomaalida oo aaminsan inay Xabashida ka burji sarayso oo goobaha dagaalka uga adag tahay, waxay Xabashida u taqaan fulay aan haadda habsan oo marka faltanka dagaalka foodda laysdarro fagaareeya. Ubadka Soomaaliyeed waxaa lagu anqariyaa oo lagu barbaariyaa nacaybka Xabashida, carruurta oo lagu baraarujiyo cadowtooyada kala dhexaysa Xabashida, waa xaq iyo wax haboon. Ayaandarro mar kastoo Soomaalidu ka adkaato Xabashida waxay u habarwacataa oo qaylodhaan u dirsataa dowladaha Kirishtaanka, waxaa la ogyahay 1530kii goortii Axmed Gurey jebiyey Xabashida in Boortaqiisku u soo gurmaday, sidoo kale 1977 markii Kacaankii MSBarre jebiyey kibirkii Xabashida waxaa u soo gurmaday Huwantii Warso oo ay hormood u ahaayeen Ruushka iyo Kuuba. Hobollada qaranka ayaa ku heesay “**Galbeed waa la xoreeyee Waarsaa Gaagixisey**

Kaadirka Ethiopia:

Dagaalkii 1977 ka dib Xabashida waxaa si fudud ugu suurtagashay inay Soomaali hub isugu dhiibaan, kana dhex abuuraan cadaawad heerkeedu gaaray umulo-doox. Ethiopia waxay alliftay shirqoolka loo yaqaan Lixland, taasina waxay muran iyo mugdi gelisay midnimadii jamhuuriyadda Soomaaliya. Nasiibdarro Soomaaliya oo ah Maxmiyad si dadban u hoos tagta maamulka Ethiopia, waxay bulshada Soomaalida ku dhex leedahay Kaadir xoog badan oo loo tababaray dabargoynta sinjiga Soomaalida, wuxuuna ka kooban yahay saddex kooxood oo kala darran:

(A) Hoggaamiyeyaaasha ururada hubaysan ee loo yaqaan Tabcane Tigree waxaa laga haqabtiraa **madfac iyo miino** lagu xasuuqo shacabka. Hoggaamiye kasta marka hagar la'aan hub loo siiyo, waxaa dhegta loogu sheegaa inuu gar iyo gardarro noqonayo madaxweynaha Soomaaliya, waxaase shardi ah inuu marka horeba saxiixo fulinta shan qodob oo kala ah :

- 1- Ciidamada Xooga dalka Soomaaliyeed inaan dib loo aas-aasin oo Soomaaliya aysan weligeed yeelan milateri awood leh
- 2- Inuu saxiixo Soomaaliya wax dhul ah oo ka maqan in aysan jirin, mar dambena aysan sheegan Soomaali Galbeed iyo NFD, halkaasna lagu hilmaamo fekradii mideynta Soomaaliweyn, isla markaana suugaanta guubaabada iyo kicinta shucuurta waddaniyada xambaarsan laga joojiyo qalabka warbaahinta iyo dugsiyada waxbarashada.
- 3- Mabda' ahaan in la xakameeyo baraarujinta, barashada iyo fiditaanka diinka Islaamka isla markaana la xirxiro culumada Gaaladu u taqaan Asal-raaca, loona soo gacan geliyo nabadsugidda Ethiopia. Xuseen MFCaydiid oo ka mid ah madaxda kooxda SRRC ayaa isagoo jooga Ghion Hotel, Adis Ababa, 01/02/2002 wareysi uu siiyey wakaaladda wararka JQM ee lagu magacaabo IRIN, wuxuu yiri "cadowgeenna ugu weyn waa Islaamka" {Our main enemy is Islamism}
- 4- In geyiga Soomaaliyeed hawaanba, dirqi iyo sandulle Xabashida laga siiyo deked ka madaxbannaan maamulka Soomaalida, dekeddaas oo sharciyan loo aqoonsanayo bogcad {enclave} Ethiopia ku leedahay dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya.
- 5- Waa in Soomaaliya dastuur ahaan u qaadataa nidaamka federaalka kala madaxbannaan {Co-federal} kaasoo ogol qabiil kasta markuu rabo inuu ka go'i karto dalka intiisa kale. Sidaas awgeed jamhuuriyadda Soomaaliya waa in loo qeybiyaa Imaarado yaryar oo lagu jaangooyey qabiil-qabiil kala madaxbannaan, isla markaana la dhaqangeliyo hindisaha Meles Zenawi ee dulucdisu tahay in Soomaaliya noqoto (Lixland = Somaliland, Puntiland, Hiiraanland , Banaadirland, Bayland iyo Jubbaland)

(B) Gudaha Soomaaliya Xabashidu waxay ka dhex abuurtay shaqsiyaad biiriqatayaal ah oo loo tababaray mashruuca la magacbaxay *Dilitaanka Nindooorka*, caado-qatayaasha u kireysan Meles Zenawi waxay si gaadmo ah ku toogtaan ama ku afduubaan aqoonyahanka bulshada {elite} sida: indheergaratada, saraakiisha, culumada diinta, takhaatiirta iyo wixii la mid ah.

(C) Waxaa kaloo jira koox loo tababaray basaasidda xogta Soomaaliya, kooxdaan jaajuusiinta ah waxaa lagu dhex firdhiyey guud ahaan geyiga Soomaaliya miyi iyo magaalo, waxayna meel kasta Adis Ababa uga tebiyaan warbixin joogto ah {daily report}. Arrimaha la xiriiira siyaasada, dhaqaalaha, difaaca iyo nabadgelyada oo muhiim u ah Ethiopia ka sokow, warbixin maalmeedka loo tebiyo Meles Zenawi, xataa waxaa lagu sheego dalagga beeraha ka soo go'ay iyo geela gu'ga dhalay. Abwaan Abshir Nuur Faarax Bacadle ayaa adeegayaasha Ethiopia shiribkan u tebiyey:

**Ukumihii Amxaaradoo ummaddii uf dhahdaad tihiin,
Abuur Ethiopiaan arkaa ummaddii yaanse aqbalayn,**

**Taariikh madowboo aan tirmeyn tabcaneyaal Tigrey u taal,
Wixii wacaaya wiil Amxaar wallaahi waa la weel duwaa,
Hadday Tigree u tanaasuleen inaan ka tashaney tegee,**

Sababtee loo takooray:

Walow dhaqanka Soomaaliyeed ee soo jireenka ah si weyn loo qiimeeyo, haddana meelaha qaar wuxuu ku leeyahay dhaliil tiro badan, nimco walba nusqaanteeda leh. Dhaqanka Soomaalida qeybihiisa ku saabsan sinnaanta bulshada iyo xulashada geyanka aad iyo aad buu u fool-xun yahay, hab-dhaqankaas ku salaysan faquuqa iyo yasidda waxaa si weyn u diidan da'yarta damiirka wanaagsan ee la hanaqaaday sebenka cusub.

Xilligii Gumeysiga ka hor, taariikhda Soomaalidu laguma sameyn jirin wax diiwaangelin ah oo mustaqbalka laga raadraaco, waxaase dhacdooyinka muhiimka ah jiilba jiilka kale ugu tebin jiray hab oraaheed aan weliba dhammeystirneyn . Si kastaba ha ahaatee marka baaris lagu sameynayo sababta loo takooray beelaha Soomaaliyeed ee la yaso oo aan muuqaal, madaama midab, dhaqan, luqad iyo diin ahaan toona ka duwanayn Soomaalida kale. Waxaa jira sheekooyin tiro badan oo ku-tiri-kuteen ah oo marka dulucdooda loo fiirsado ku biyo-shubanaya laba aragtiyadood {version} oo sida qaalibka ah inta badan bulshadu ku fasiraan sababtii keentay takooridda beelaha la yaso. Labada aragtiyadood midi waxay u muuqataa been abuur aan caga badan ku tagneyn balse fekrada kale ayaa marka dib loo eego sida waayadii hore ay ku imaan kartay isbeddel ku dhaca hab dhaqan beeled waxaa la oran karaa ilaa xad waa macquul la barxay.

(1) Aragtida kowaad waxay leedahay waqti aad u fog geyiga Soomaalida waxaa ka jirtay beel aad u tiro badan oo awoodeeda ballaaran ugu talin jirtay kuna xukumi jirtay beelaha kale oo dhan. Lama garanayo waxaa la isku qoonsaday, waxaase la sheegay beelihii kale inta isbaheysteen inay dagaal ku qaadeen kuna jebiyeen beeshii awoodda badnayd. Ayaandarro intii la dilay mooyee intii kale oo maxaabiis laga dhigay ayaa xero lagu ooday, halkaasna ay badankoodii silic iyo gaajo ugu le'deen. Dadkii ka haray beeshii laga adkaaday darxumo darteed xeradii ciqaabta qaar baa ku dhintay. Maalintii qof xerada ku dhintaba bulshadii kale waxay halheys ka dhigatay weerta ah “Maantana **MID GO'** weedhaas waxaa loola jeeday maantana qof baa xijaabtay. Intii yareyd ee ka badbaaday Allena ka samatabixiyey xeradii ciqaabta, maadaama aysan lahayn bar-xoolaad iyo beer toona, waxay noqdeen dagaag dabato ah isla markaana waxaa dantu ku kalliftay inay nolol maalmeed ka dhigtaan kana shaqaystaan meheradaha Soomaalidu ka faanto sida: kalluumeysi, ugaarsi, kabo-tolis, dhar-sameyn, bir-tumis, timo xiiris, dhul-xaaq, xoolo-qalidda iwm. Waxaa kaloo weliba lagu sameeyey bahdil iyo Ab-dhalsho doorin iyadoo lagu toley halheyskii ahaa MID-GO' magacasoo muddo kadib isu rogey hayb beeled aan aasaas isir iyo abtirsi taxane ah toona lahayn balse ku midoobay xirfadaha laga faano.

Runtii lama macneyn karo waxaa dhibka intaas le'eg loo marsiiyey beeshaas oo ilaa maanta lagu hayo ficil-xun iyo aflagaado joogto ah oo loo raaciyey bah-dil iyo yasid, waxaase la yaab leh in ummadda Soomaaliyeed weligeed hal marna aysan ka yeelan shir iyo wada tashi wax looga qabanayo takoorida aan wax qiil ah loo hayn ee lagu hayo

walaalo Soomaaliyeed oo sinji ahaan aan dhinac kasta isaga sidkan nahay. Sheeko la yaab leh oo arrintan tusaale u noqon karta waxay tahay, jufo u dhalatay beesha Mareexaan ayaa dhegta dhiigga u dartay ninka la oran jiray Maxamad Daa'uud oo ahaa hoggaamiye dadku si weyn u jeclaa isaguna hayb ahaan Mareexaan ahaa. Dilkii Maxamed Daa'uud waxaa ka xumaaday jufooyinkii kalee beesha Mareexaan waxayna si wadajir ah **washamsi** ugu qaadeen jufadii hoggaamiyaha dishay, waxaa laysugu daray rag badan oo laga laayey iyo xoolihii oo laga dhacay, dabadeed jufadii la jebiyeey markay noqotay dabato aan xoolo lahayn waa la takooray, waana geyaan seegeen oo waayadii hore lama guursan jirin.

Dib-u-dhaca dhaqan dhaqaale ee la degay Soomaalida, inta badan waxaa loo aaneeyaa horumar la'aanta sancada iyo ka faa'iidayso la'aanta khayraadka badda, maxaa yeelay waxaa la yasay oo weliba la takooray dadkii ku hawlanaa horumarinta farsamada: biraha, kabaha, dharka, nadaafadda, ugaarsiga iwm. Sidoo kale waayadii hore kalluumaysatada waxaa loo yiqiin Jaaji iyo lohod cunayaal nasab dhiman ah. Soomaalidii hore waxay aaminsanayd belaayo madow inay badda ku dhex jirto oo aysan barako iyo khayr toona lahayn, fekradaas dhowr maahmaah ayaa lagu fasiray, waxaaa ka mid ah: Nin bad ku dhac yaab wuxuu sheegona ma yaqaan. Saddex macaash iyo marax midna lagama helo: Roob bad ku da'ay, cilmi xaasid galay iyo shahwo habar gashay. Aqoon la'aanta muhiimadda badda waxaa kaloo laga dheehan karaa, Soomaalidu waxay naf iyo maalba u hurtay xoreynta (NFD, Soomaali Galbeed & Jabuuti) balse weligeed xataa maalin qura ma sheegan Jasiirada Soqodara, madaama khayraadka baddu aysan wax qiime ah u lahayn. 1990kii aniga iyo saaxiibkey ayaa diyaarad casri ah ku safarnay, sida loo hormariyey oo wax walba loogu dhameystiray diyaaradda ashqaraar ayey nagu riday. Saaxiibkey ayaa yiri eray qiime leh oo dhaxalgal ah, wuxuu igu yiri: "diyaaraddaan waxaa samaystay ummad aan aflagaadeyn oo aan takoorin Tumaalkeedii ee ha la yaabin oo hala indha-daraandarin." Kooxaha la faquuqay shaqooyinka ay waddanka u qabtaan waa muhiim saldhig u ah jiritaanka nolosha aadamiga, marka laga reebo caado-qaataha umulaha ka qaraabta oo runtii mudan in la takooro xirfadiisa darteed.

(2) Sheeko oraaheeda labaad oo ah mid kutiri-kuteen ah, waxaa lagu sheegay qiso aan macquul ahayn, waxaa la yiri, oday la oran jiray Gorgaarte Hawiye baa laba wiil dhalay (Maxamed iyo Maxamuud). Seben lagu jiray xilli jiilaal iyo abaar oodo-lulul ah ayaa labadii wiil socdaaleen, saranseerkii safarka darteed waxaa asiibay, gaajo darran oo ay ku sigteen baqti cunis iyo bakteyle-qalad, dabadeed nafta oo ku dabayar waxay heleen neef baqtiyey, waxaa dantu ku kalliftay inay neefkii baqtiyey hilibkiisa wax ku cunaan. Markay ka hamuun gooyeen oo nafta ka ceshadeen, Maxamed Gorgaarte wuxuu neefkii ka qaatay cad hilib ah oo sahay ah, balse Maxamuud waa diiday inuu wax hilib ah qaato.

Markay gurigoodii ku soo laabteen, waxay abbahood u sharaxeen wixii dhacay, odaygii wuxuu qaadan waayey wiilashaada ayaa baqti cunay, dabadeed wuxuu u yeeray waxgaradkii beesha, arrintii dhacday oo ahayd *ugub* waxaa loo xilsaaray xeerbeegti go'aan ka soo gaarta waxaa laga yeelayo shilkii ku dhacay labada wiil. Xeerbeegtigii waxay go'aamiyeen in Maxamed Gorgaarte la takooro oo aan la guursan faraciisa, madaama aysan ahayn geyaan la siman bulshada inteeda kale. Go'aankaas jowrfalka ah

wuxuu horseeday in faracii Maxamed Gorgaarte loo aqoonsado Midgo, waxaa la raaciyey kooxihii hore loo takooray.

Haddii caqliga laga shaqaysiiyo, sheeko oraaheedka sare ku qeexan waxay u muuqataa been abuur aan beyd run ka ahayn, sababtoo ah:- (1) Si nafta loo badbaadiyo oo aan gaajo darteed loo geeriyoon Shareecda Islaamku waxay ogoshahay oo xalaaleysay in neef baqtiyey wax laga cuno, hase yeeshee Shaareecda Islaamku waxaa si cad loogu mamnuucay: dilka qof aan waxba galabsan, kufsiga, dhilleysiga, xatooyada, bililiqaysiga, boobka, dhaca iwm, ceebahaasoo ka mid nolol maalmeedka bulshada. (2) Teeda kale oday laba wiil keliyaha dhalay inuu mid u takooro cunista hilib baqtiyey darteed waa waxaan dhici karin oo aan suurtagal ahayn, waayo arrintaani waxay liddi ku tahay sheeko oraaheedyada kale ee lagu sheego, beel heblaayo odaygii ay ka soo farcantay waxaa laga helay ceel, beel heblaayo odaygii ay ka soo farcantay waxaa la helay isagoo baadi ah oo soo lumay, beel helaayo odaygii ay ka soo farcantay gabadh gacatay ayaa dhashay oo aabbihi lama yaqaan iwm. Teeda kale Soomaalidu taranka dadka aad bay u jeceshahay siiba wiilasha, waxaana jirta murti oranaysa *“rag xalaal ah iyo geel xalaal ah midna xero lagama buuxiyo.”* Oday wiilkiisa inuu isugu daro dayro iyo takoorid in aysan macquul ahayn waxaa daliil cad u ah, maanta oo dadku aad u tiro badan yahay lama takooro: wiilka isbaarada dhigta ee islaamaha furta, wiilka haweenka dhowrsoon kufsada, xataa lama takooro saqajaanka liita iyo laga roonaha nimow naagga ah. Haddiiba ay run tahay wiil baadi ah oo lumay in la koriyey, sidee loo deyriley oo loo takooray wiil la dhalay?

Bilaawga cutubka aas-aaska 30ka urur-qabiil, waxaa ku soo xusay Soomaalida reer-guuraaga ah, wax yar oo fara ku tiris ah mooyee, in aysan waddaniyiin ahayn. Nasiib wanaag beelaha tiro yarida iyo geel la'aanta darteed loo takooray, reerguuraaga kale waa ka waddanisan yihiin, waxay caan ku yihiin hal-abuurka suugaanta xamaasadda waddan jaceylka xambaarsan, waa geesiyiin aan ishoodu libiqsan, waa gumeysi diid Gaalada aad u neceb, waxay u geyfan yihiin gargaarka shacabkooda iyo horumarinta dalka hooyo. Qoraa ahaan waxaan ku talinayaa, haddii la doonaayo in silica iyo dhibaataada laga samatabaxo, waxaa sixirfur ah in la xaalmarayo oo weliba la xoreeyo, lagana ducaysto dadkaas iyagoo haba-yaraatee aan waxba galabsan, wax iin ahna aan lahayn kibirka iyo jaahilnimada loo faquuqay. **“Waxyi iguma soo dego, haddana wax ima seegaan”** haddaan la xaalmarin oo aan laga ducaysan, qalalaasaha iyo qaranjabku waa jiri doonaa. Abshir Nuur Faarax Bacadle oo ka damqaday dhibaata loo geystay beelaha dulman ee la takooray ayaa tiriyey gabay aad u dheer, waxaa ka soo xulay:

Ibliis wuxuu noo laqimay,
Alliyo nabina ogoleyn,
Aqligana aan geli karayn,
Asal iyo farac lahayn,
Adduunkana laga aqoon,
Sidee baad ku aqbasheen,
Amaad uga aamusteen,
Ma waydnaan islaam ahayn?

Aqoonyahankeenna iyo
Abwaankiyo culumadiyo
Indheergaradkeenna iyo
Iibaxa kuwa sheegta iyo
Asxaabul cuquulkayaga,
Iyo ururada bulshada,
Oday dhaqameedyadiyo,
Intii iimaanku solay,
Amuurtaa jaahiliga ah,
Sidee baad ku aqbasheen,
Amaad uga aamusteen?

Dameer la uleynayaa,
Aqligu wuxuu keenayaa,
Inaad ka xanuunsatoo,
Alle abaal uga sugtee,
Ma ruux aadami ahooy,
Islaam ahaad leedihiin,
Ummadaad ka xun tihiiin,
Ma ahid awlaad nasab ah,
Intaa waxaa igala daran,
Xataa weli meydin oran,
Amuurtani waa iftaro,
Dulmigiiyo ilhaanadaan,
Ummad dhan lagu fongoray,
Sidee baad ku aqbasheen,
Amaad uga aamusteen?

Ummadda ha looga digo,
Ma waydnaan awooddi karin,
Wax daran baad aaminteen,
Oo aad ku adkeysateen,
Amuurtaan kafaaradeed,
Waa inaanu is guursanaa,
Wax kaloo ay ku ansaxayso,
Wallaahi inaan la arag,
Nikaaxii aad inkirteen,
Aqbalnay waa inaad dhahdiin,
Allena loo soo noqdaa,

Axad uu nabi Aadam dhalay,
Islaam ahoon gaal ahayn,
Abuurkeennii horiyo,
Asalkayagii mid yahay,
Umul Xaawana dhashoo,

Uur aan wada jiifanoo,
Ib-naas wada nuugnayoo,
Udgoonaa hooya tiri,
Ilhaanna lagu fongoray,
Ma ogine wayska aqbalnaye,
Qof iyo camalkiisa iyo,
Inna agramakum cindallaahi,
Adqaakum ma inkirteen?

Shirib: Nasabkii Nuuxya Aadamoo, hal naas wada nuugayaa tihiiin
Asleyunkiyo ijmaaciyoo, waxaan athar cilmiya ahayn ogaada waayska iftaree.
Inna agramakum cidallaah, adqaakum saad u inkirteen?

Haddii qof geeri ku sigtay hilib uu cunay darteed loo takooray, haddii farsamayaqaankii hubka (waran & toorey) sameeyey xirfadiisa darteed loo takooray, haddii ninkii kabaha tolays iyo kii taaloogga xiiray la takooray, haddii ninkii dharka sameeyey la takooray, waa su'aal da'weyn oo maanka daalinaysee, maxaa tallaabo laga qaadi karaa ragga ku hawlan qaranjabka isla markaana Soomaalida tabaalaysan u xagal daacinaya nacabka Xabashida oo sida la ogsoon yahay ay na dhextaal cadaawad faca weyn oo cirriqeedu kasoo jeedo khilaaf ku saabsan **dal iyo diin?**

Qoraa ahaan aan rayigeyga soo qadimo, *Adeegayaasha Ethiopia waa in loo aqoonsadaa Ukun Amxaaro*. Waxaa qabaa in Kaadirka Ethiopia xaaladooda loo wajaho laba hab oo dar-Alle isugu soo beegmay, balse loo baahan yahay in si ballaaran loo agaasimo. Marka hore waxaa ila quman in shirweyne loo qabto xeerbeegti dhaqanka Soomaalida ku xeeldheer oo laga soo dhex xulay qeybaha bulshada, xeerbeegtidaas waxaa looga baahan yahay inay soo saaraan go'aano taariikhda gala oo laba ujeeddo leh:

1. In la xaal mariyo oo loo galliimo isla markaana la siiyo gabdho godob-reeb ah, loona raaciyoo magdhaw dhinacyada daahirka iyo baadinka, si loo ilowsiiyo dhibaatadii iyo xumaantii hore loogu geystay dadka sida gaboodfalka ah loo takooray.
2. Taas beddelkeeda in la faquuqo oo la takooro, oo aan mustaqbalka laga guursan loona guurin, lagana sameeyo tirokoob sugan kooxaha iyo shaqsiyaadka daba-dhilifka u ah Ethiopia ee caqabadda ku ah midnimada iyo masiirka Soomaalida. Waxaa ila haboon in Kaadirka Ethiopia hal dabaqad {Category} laga dhigo, loona aqoonsado hal beel isla markaana loo bixiyo afar magac midkii ku haboon:

Beesha:Tabcane Tigree.

Beesha: Ukun Amxaaro

Beesha: Abuurka Ethiopia

Beesha: Xerta Xabashida

Cabdidhuux ayaa yiri: “*Soomaaliya waa buktaa, bisteed weeyoo la hubi*”. Guud ahaan gees-ka-gees geyiga Soomaaliya belaayo madow ayaa ku habsatay oo beerka jartay.

Cudurka oo la garto waa furaha caafimaadka. Cudurka Soomaaliya cardaadiqaha ka dhigay waa jeermi Ethiopia abuurta, cirriqiisu wuxuu ka soo jeedaa Adis Ababa, waa hubaynta ururada astaantoodu tahay saddexda xaraf (RRA, USC, SPM, SNF iwm) balse lagu naanayso **Tabcaneyaasha Tigree**, waa isku soofeynta beelaha Soomaalida oo Adis Ababa laga abaabulo. Waxaa jeermigaas sii dheer oo Keenya la wadaagtaa saddexda khatar ee xarafka (Q) ku taal ee qarankii Soomaaliya rogay, waxay kala yihiin: *qaad cagaaran, qori rasaas leh iyo qabyaalad anaaniyad leh*. Maalin walba diyaarado laga soo buuxiyey suntan cagaaran ee loo yaqaan *Qaadka wax walba qaatay* ayaa Adis Ababa iyo Nairobi laga soo waaridaa, sumaynta iyo suuxinta bulshada ka sokow, labada cadow (Ethiopia & Keenya) waxay xaalufiyeen dhaqaalaha Soomaaliya oo markii horeba dhulka yiil.

Waa ayaandarro weyn iyo wax laga qoomameeyo in adduunweynuhu aqbalo, Ethiopia & Keenya ayaa daweynaya oo shir dib-u-heshiisiin u qabanaya Soomaaliya oo sakaraad la ah suntii Adis Ababa iyo Nairobi laga soo afuufay. Soomaalidu waxay tiraah waraabaha aamusan iyo waraabaha qaylya, waxaa khatarsan midka aamusan. Keenya oo ah waraabe aamusan, waxay ku andacootaa inay si weyn ugu dhabar jabatay shirkii ma-dhaamde ee labada sano iyo dheeraadka uga socday ururada Soomaalida Mbaghati-Nairobi. Xaqa haddii afka laga daboolo feeraha ayuu ka dilaacaa, Soomaalidu waa masaakiin la dulmay, waxaanna dhul dhigay faragelin Shisheeye nacab ah. Keenya oo dusha u ridatay abaabulka iyo ka miro-dhalinta shirka ururada Soomaalida, intii shirku Mbaghati ka socday, dowladda Keenya waxaa ka soo yeeray laba arrimood oo laga naxay balse kashifay shirgoolladii dahsoonaa:

* Goblka NFD ee Keenya gumeysato ka sokow, xaafadda Islia ee Nairobi waxaa si rasmi ah u degan kumanyaal Soomaali ah oo u badan ganacsato wax weyn ku kordhiyey dhaqaalaha Keenya. Gaadiidka (cir-dhul-bad) u kala goosha Soomaaliya iyo Keenya xataa hal saac ma hakado, isu socod ballaaran ayaa ka jira xuduudda labada dal. Waxaa intaa sii dheer ergooyinkii shirka ka qeybgelayey oo maalin walba ku sii qulqulaya Nairobi ayaa dowladda Keenya waxay joojisay in dalkeeda lagu galo Basaboorka Soomaaliya, waxayse ogolaatay Soomaalidu inay soo qaataan basaboorka Ethiopiaan lagu macmalay {fogery} Muqdisho iyo Nairobi (Cabdalle Shadeeya iyo Islia), taasoo macnaheedu yahay in marka hore la tirtiro astaamaha jiritaanka qaranka Soomaaliyeed, kadibna Soomaaliya loo aqoonsado shacab hoos taga Ethiopia, Kilinka 6aad.

* Nasiibwanaag, Alle ayaa ka dhawaajiyey madaxweynihii hore ee Keenya Denial Arap Moi. Shirkii lagu heshiisiinayey ururada Soomaalida oo weli ka socda Nairobi, ayaa Moi wuxuu qarsanwaayey oo afku ka xaday erayo naxdin leh oo xambaarsan cadowtooyo qotadheer, balse qofkii dhiig Soomaali ku jiray ku baraarugay, hase ahaatee doqon iyo Tabcane Tigree ma fahmin nuxurka shabakadda shirgoollada daadsan. Mr. Moi oo boqasho ku joogay Washington ayaa 19/09/2003 wuxuu yiri “*Soomaaliya oo hesha qaran midaysan iyo baraare, waxay sheegan doontaa gobollada ka maqan, taas ayaa waddamada derisku ka cabsanayaan*”

Buur baa foolatay, waxaa lays weydiiyey maxay dhali doontaa? Buurtii waxay dihataba waxay dhashay cirbad, taasina waxay noqotay fajac iyo amakaag. Shirkii samatabixinta

Soomaalida labada sano iyo hee-heeda uga socday (Eldoret & Mabaghati) oo lahaa laba dhaqtar (Mwai Kibaki & Meles Zenawi) iyo laba kalkaaliye (Mwangale & Kiplagat), labada sano iyo dheeraad markii laga dhursugayey oo lagu fooliyey garoonka Kaisarani-Nairobi, wuxuu dhalay *Dagaal-ooge iyo Dilaa-sare*. Shirkii shisheeyuhu u qabtay ururada Soomaalida ama kooxaha lagu naanayso Tabcane Tigree inuu yahay shimbirayahow heesa, hees wanaagsan heesa, kaasoo wax natiijo ah aysan ka soo bixi doonin, waxaa kashifay oo weliba ka dayriyey indheergarato Soomaaliyeed oo faktii horeba dareemay qurunka la huurinayo ee cuskan *qawda maqashii waxna haw qaban*. Rag damiirkoodu wanaagsan yahay ayaa sii odorosay khatarta ka soo fool leh shir-ku-sheegga cadowgu abaabulay, siyaasiyiintii saadaaliyey suntan Keenya lagu walaaqayo waxaa hormood ka ahaa:

- Cabdirisaaq Xaaji Xuseen oo ah ruugcadaa RW dalka ahaan jiray.
- Cali Mahdi Maxamed oo noqday madaxweyne ku meel gaar ah.
- Prof. Cabdi Ismaaciil Samatar oo ah bare-jaamacadeed USA

Taariikhiyan ragga gabya weligood waxay ahaayeen indheergaratada ummadda, waxay bulshada ku hagaan hillinka toosan, markasta waxay ka digaan halista ka soo foolleh hadimada Gumeysiga. Marka la qiimeeyo waayihii la soo maray iyo marxaladda qalafsane taagan waxaa muuqata, culumada diinta iyo gabyaaga mooyee Soomaalidu in aysan lahayn aqoonyahan kale oo ay gablan ka tahay. Qadarin iyo xushmad ay bulshada ku dhex leeyihiin awgeed, labadaan kooxood fariinta ay gudbiyaan si niyadsami ah ayaa dadweynuhu u qaataa, sababtoo ah murti madhaafaan ah ayaa waxay leedahay, bulshada waxaa samaha ku haga oo xumaha uga diga saddex: Sheekh mufti ah, Shaacir abwaan ah iyo Shardabaal oday ah. 1970-yadii Kacaankii Oktoobar oo tixgeliyey kaalinta suugaanhyanku uga jiro horumarinta dalka darteed ayaa MSBarre wuxuu soo saaray sharci lagu qeexay, abwaannada hal-abuurka maansadu inay yihiin jaamici heer sare ah. Dhowr gabyaa oo ay ka mid ahaayeen: Mustafe, Bacadle, Yamyam iyo Tabantaabo ayaa odorosay natiijo la'aanta shir-ku-sheegii shisheeyuhu abaabulay, murtidii ay soo bandhigeen waxaan ka soo xulay jiiftadaan Tabantaabo tiriyey:

Ameerika iyo Awsteraliya,

Asiya iyo Ayrobba,
Anagoo Afrikaan ah,
Imaraadka Carbeed,
Amxaarkan Asafaah,
Muwaangale af-buur,
Addoonkii Kibligaat,
IGAD baa wax dhisaysa,
Oo dowlad aayo wanaagsan,
Oo arladeenna u fiican,
Oo amaanka soo celinaysa,

Arlo Keenyeey ka imaan,
Aniga iila ekaa,

Ayax baa beer ag fariistay,
Oo islaaxii mirihii,
Iyo abuurkii afka saarin,
Oo iska eeganaya,
Ri baa awr foolanaysa,
Gorayaa afar naas leh,
Eger ah oo la salaaxay,
Ubadna loo lisayaa,
Uubataa ari raacday,
Aroorisoo aan mid ka taaban,
Oo aqalkii wada keentay,

Isticmaarkaanu ogeyn,
Oo lixda aag noo kala ooday,
Arladeenna Soomaali,
Aayatiinkeenna dambeetona,
Dabargo'ii ummaddeenna,
Ethiopiaan u wakiishay,
Ugub maahan midaani,
Arrintu wayska caddaan,
Waa ujeeddo Gumeysi,
Olole uu kicinaayo,
Waa siyaasad aguugan,
Waa amaarad shirqool leh,

Waa middaan aragnaayoo,
Waa abaabul Gumeyste,
Ishaarooyinka muuqda,
Haddii aan in-ka sheego,
Odayaal isku sheegga,
Ergada ay ka dhigteen,
Kuwaan ay urursheen,
Aragtidayda yartaa,
Aniga iila ekaa,
Aboor madaxa,
Jirac wada askar ah,
Shillin amaah doon ah,
Udbo dad ah,
Ergana loo dirsaday,
Lana afduubaayo,
Orgi duqah,
Arrimo loola tegay,
Dibina eegaayo,
Aqal xiran,
Eed lagu dhex furay,
Awr ka talinaysa,

Awoow gaban ah,
Iyo ubad cirro leh,
Aabbe kaba sii yar,
Ibo daya,
Naagaha irmaan,
Odayo nuugaaya,
Aqli gaaban,
Iimaan gurracan,
Aragti hoosaysa,

Abjamayeey amuuraha kan jira waanu aragnaaye,
Ummaddaan aslaaxeedii iyo sharafti yaa aasay?
Islaamnimada diintiyo nabadda yaan oogin?
Yaa urur Gumeysteha noqday oo ibo guryeynaaya?
Arrintii wanaag lehba yaa diidan unugeedda?
Indheergardkii yaa aamusiyey iyo aqoonyahanba?
Culumadeennii yaa kala eryoo iniqba meel geeyey?
Odayaashii yaa kala qeybsaday noo arriminaayey?
Maxamed warsame Tabantaabo ayaa ka tiriyey shirkii Mbaghati.

Sida Xabashida, Keenya Gumeyste maaha, dhibaataada dhextaal iyada iyo Soomaaliya waxaa abuuray Gumeysiga Ingiriiska, sababtoo ah, 08/03/1963 Mr. Ducan Sandys Xoghayihii Isticmaarka ayaa si rasmi ah ugu dhawaaqay NFD inay ka mid tahay Keenya. Dhulka NFD oo Soomaalidu leedahay ayaa Gumeysiga Ingiriisku u hibeeyey Keenya, si geeska Afrika looga abuuro xasarad joogto ah {Ever lasting problem}, hase ahaatee 28/10/1967kii Mr. Denial Arap Moi oo xilligaas ahaa madaxweyne ku xigeen iyo RW MICigaal ayaa magaalada Caruusha-Tansaniya ku kala saxiixday heshiis lagu qeexay in xiisadda la qaboojiyo oo wax kasta lagu dhameeyo wada-hadal ku dhisan Afrikanimo. Mr. Moi oo heshiiskaas qalinka ku duugay inuu 36 sano kadib la shir yimaad gocasho ku salaysan cadowtooyo iyo burburinta qarannimada Soomaaliya, wax la filaayey maahan. Haddii Denial Arap Moi fekradaas gurracan aaminsan yahay, Meles Zenawi muxuu aaminsan yahay? Waxaa la rejeynayaa jawaab laba afley ah, mid laga sugayo waddaniyiinta damiirka wanaagsan iyo mid laga sugayo kooxaha Tabcane Tigree.

1970-yadii MSBarre wuxuu hawlgeliyey askar tiro badan, dadweynihii ayey si xun u kadeedeen, shacabkii la dulmay waxay isku dareen baryo Alle loogu galliimay inuu culayska ka dulqaado iyo inkaar askarta lagu habaaray in belaayo asiibto. Nin la oran jiray Yuusuf Badane oo ahaa reer Aadan-Yabaal ayaa ku shirbay: *“Allihii keenay kaakiley, inuu kacshaa laga koraa”*. Soomaaliya siday u indha-xun-tahay uma Alle la’a, dhowaan waxaa la rejeynayaa in sharaftii Soomaaliya dib u soo noolaato. Sida Yuusuf Badane oo kale waxaaan leeyahay, Amxaarkii Af-Soomaaliga yiqiin Dr. Cabdimajiid Xuseen safiirkii Ethiopia ee JQM, Allihii cudurka xun ku riday ee aakhiro u diray waxaa laga rejeynayaa inuu aakhiro u diro inta weli ka nool kooxaha Tabcane Tigree.

Sidii Yuhuuddu ugu faraxday geeridii Jamaal Cabdinaasir isla markaana guud ahaanba Gaaladu ugu faraxday geeridii Boqor Faysal Cabdulcasiis, sidaas oo kale dadka jecel

samaanta Soomaalida, meel ay joogaanba waxay aad ugu farheen geeridii Dr
Cabdimajiid, rag badan ayaa tiriyeey gabayo rayrayn iyo digasho xambaarsan, waxaa ka
mid ah Maxamed Warsame Tabantaabo, wuxuu ku maansooday:

Inkaar-qabe Ato Meyle,
Amxaarkuu UNada geystee,
Na asaraaraayey,
Af-Soomaaliguu garanayaa,
Loo adeegsadayey,
Ajashii kolkey u timid,
Nalaka siib oofe,
Abris iyo abeesuu ka tegay,
Baa soo abaabulane,
Allahayow Amxaarkii baqtiyey,
Maad iilka ugu geysid,
Oo ololka naareed ku tuur,
Idil ahaantoodba,
Abrahaba Kacbada Illaahey
Aabi ugu duuliye,
Intii kibirtay,
Abaabiil baa lagu salliday,
Oo eber ka siiyeene,
Kuwaan harayna waa aynigii,
Tan iyo aamanuu jiraye,
Allahayow Islaam baan nahaye,
Oo diinta aaminaye,
Amxaariyo intii raacsanba,
Eber ka sii manta
Ehelka Shaydaanka ..Aamiin

Sidoo kale gabyaa Dhunkaal Faarax Barre, ayaa gabay dheer oo kuhaan ah u diray
kooxaha Tabcane Tigree, waxaan beydadkiisa kasoo xulay kuwan:-

Geyigeena oo xora annagoo dowladnimo gaarnay
Gablamaha cadaawuhu watee gadaya Soomaali
Ee gibilka inooga eg haddana garan afkii hooyo
Alle gowrac gacal maahoo waa Gaalo ubadkeede
Godkuu galay Cabdimajiid Eebow goor dhow lagu aaso
Geeridii wadaadkii dishaay gurubso gaagaabta
Allow guusha haw dhiibin waa garac Tigreeyaade
Gudubtadu ha sheegtee nimanka geliya taariikhda.

Gabyaa Dallaayad oo ahaa reer Hargeysa ayaa isna seben hore ku maansooday:
Daadkii wadaadkii dilow Diiriyaa haraye
Waan kuu duceeyaa markaa daallim qaadoba'e
Adigaan askeri dowlo iyo cidi ku doonayne,

**Diihaal gabowdaa fadhida damasha waaweyne
Isaga Aw Dawiil dactal ka dhaaf kuumabaan dirane
Laf-Cambena duqee waysku diir labada doofaare.**

Cutubka 21aad: Doorashadii Cabdullaahi Yuusuf:

Daliil runah daruus aan ka qoray xaalka degi-waayey

Dad walaala duul wada dhashoo laysu dacareeyey,
Soomaalidaan kala didee qoloba daan aaday,
Dembiyada dhacaayee ka badan miraha deegaanka,
Dawadaan bukootee dabiib looga dhigay maarta,
Dembigaan ninkii geystay baan idin dareensiine,

Nin wax diley haddii aan la dilin ee la iska sii daayo,
Waa inuu dilkiisii sii wataa saa la dili-waaye,
Degdeg weerar waa inuu galaa saa la dili-waaye,
Nin doorkoo dhan waa inuu dilaa saa la dili-waaye,
Diin Islaamle waa inuu dilaa saa la dili-waaye,
Dagaal diide waa inuu dilaa saa la dili-waaye,
Malcaamadaha waa inuu dunshaa saan la dili-waaye,
Masaakiinta waa inuu dubaa saa la dili-waaye,
Dal iyo maalba waa inuu gubaa saa la dili-waaye,
Dadkuna waa inuu dabargo'aa saa la dili-waaye,
Dilkuna waa inuu sii bataa saa la dili-waaye,
Dembigu waa inuu sii kordhaa saa la dili-waaye,

Dilaa sare waa inuu usii dallaco saa la dili-waaye,
Digtatoori waa inuu noqdaa saa la dili-waaye,
Dastuur gaar ah waa inuu degsado saa la dili-waaye,
Boqortooyo waa inuu dalbado saa la dili-waaye,
Duruus beenah waa aqriyo saa la dili-waaye,
Wejigiisa waa inaan la deyin saa la dili-waaye,
Waa inaad madaxa hoos uga dedaan saa la dili-waaye,
Soo dareera goortuu yiraah saa la dili-waaye,
Waa inaydin deri yeelataan saa la dili-waaye,
Waa inaad dhamaan daba-gashaan saa la dili-waaye,
Dadnimo waa inaad kala tagtaan saa la dili-waaye,
Dullina waa inaad soo baxdaan saa la dili-waaye,
Dumarkuna durbaannada u tumo saa la dili-waaye,
Ragguna waa inuu sacab ku daro saa la dili-waaye,
Duca-qabe waa inaad dhahdaan saa la dili-waaye,
Dirqina waa inay idinku tahay saa la dili-waaye,
Wuxuu doono waa inuu falaa saa la dili-waaye,
Qarannimo waa inay duntaa saa la dili-waaye,
Dalka iyo dadkuba waa inay baaba'aan saa la dili-waaye,
Waa inuu Xamarna Daafeed u raro saa la dili-waaye,

Hargeysana badweynta u diro saa la dili-waaye,
Kismaayona webiga uu dhex daro saa la dili-waaye,

Ummad yahay daguugani ee qalbigu daxalaystay,
Diintiyo kitaabkii Allaad daba-maryeyseene,
Waxaad deyrka ugu oodan tahay daalim iyo qaa'in,
Deylaaba idin dhaanta iyo sacii diilinta lahaaye,
Iyagaaba darkii garanaya iyo doono ubadkiiye,
Daab iyo masaar waxaad tihiin duulna garanwaaye,

Dilaa sare haddii u dalcay oo la dili-waayey,
Dad wixii ka haray waa kuwaan haatan uu diliye,
Dad waa dilis dagaal waw kalahis dulucdu waa weerar.
Dadaal iyo midnimo wayska deyn sharafi waa daadin.
Dakaniyo colaad waa hirgelin nabadi waa duugis.
Diif iyo xanuun iyo darxumo dabargo' waa raadin.
Daacad iyo wanaag waa ka durug belona waa doonis.

Haddii kale dantiinii gartoo daalimkaas dila,
Dabadeed midnimadii dalkiyo daawo wada qaata,
Dar-Illaah u soo jeesta oo diinta wada raaca,
Dariiqii Rasuulkii maroo diinta wada raaca,
Dawiyoo nabad wada raadiyoo diinta wada raaca
Waxaa tiriye: Maxamed Warsame Tabantaabo

Axad 10/10/2004 garoonka Kaisarani-Nairobi, Xildhibaanada Soomaalidu waxay Kornayl Cabdullaahi Yuusuf Axmed u doorteen madaxweynaha jamhuuriyada Soomaaliya muddo shan sano ah. Nin baa laga hayaa **“Waxyi iguma soo dego haddana wax ima seegaan !!!** Doorashadii Cabdullaahi Yuusuf oo la mid ah tii {Charles Taylor, Libria} aafada Axadley ee ku xusan cutubka la soo dhaafay, hubaal waxay isu beddeli doontaa **Yaboohii Cadaabta.**

Alle adduunka wuxuu udbaha u taagay Axad, maalintii ku xigtay oo Isniin ah markii la qiimeeyey adduunka, waxaa la qiray in Axaddii shalay ay wanaagsanayd. Sidaas awgeed waxaa laga curiyey murti oranaysa **“Adduun gadaal u xun oo aayo maleh”**. Intii aan ifka soo joogay, sannad sannadka ka dambeeya ka fiican weligay hal mar baan arkay, wuxuu ahaa 1991-92 Koofurta waxaa ka jiray gaajo ba'an oo qolofa mooska la cuno, sannadkii 1993 raashin tiro badan oo ICRC ay keentay ayaa ciidankii UNITAF qeybiyey, raashinkii xad-dhaafka ahaa kiishka bariiska wuxuu gaaray shan kun shilin, markii dadku ka dhergay malaha xoolahana waa la siiyey. Hasa ahaatee weligay ma arkin mana maqlin laba hoggaamiye Soomaali oo kii dambe fiican yahay, mar kasta waxaa lagu calaacalaa kii hore waa loo darsaday.

Maamulkii iyo hab-dhaqankii MFCaydiid markii la qiimeeyey, waxaa loo duceeyey MSBarre oo la yiri Allow MSBarre raalli ka noqo **“Salaamullahi Calal Xujaaj”**. MFCaydiid saaxiibkii Cabdullaahi Yuusuf oo saaxadda siyaasadda uga dambeeyey,

maxaa la oran doonaa? Nin baa laga sheegay heblaayaan aqaanoo meel fiican kuma dhasho. Maamulka Cabdullaahi Yuusuf waxaa lagu qiimayn doonaa samaan iyo xumaan waxqabadkisa, taasna aan u daayo waqtiga iyo waayaha, balse aan soo qadimo tallaabooyinkii Cabdullaahi Yuusuf qaaday bishii u horaysay maamulkisa:

* Muddo ka badan laba sanadood markii shirka dib-u-heshiisiint Soomaalidu ka socday dalka Kenya, ayaa markii ugu horeysay lagu guuleystay isu keenista xubno baarlamaan oo laga soo xulay qabaa'ilka Soomaalida, kaasi oo ka kooban 275 Mudane. Tallaabadani waxay guul iyo farxadba u ahayd qaban-qaabiyayaashii shirka oo ahaa waddamada ku bahoobay urur gobolledka IGAD, gaar ahaan waxaa si weyn libinta isu siiyey dalka Kenya oo quus ka taagnaa horumar la'aanta shirka, taasi oo ay kala mid ahayd Soomaalida inteeda badan oo aaminsan illaa hadda in shirka iyo miraha ka dhashaaba aysan wax xal ah iyo wanaag toona ku soo biirin doonin wax ka qabashada xaaladda murugsan ee Soomaaliya ka oogan, maadaama hoggaaminta shirka ay gacanta ugu jirtay lug weynna ku lahaayeen waddamo khilaaf dhinaca soohdimaha ah uu kala dhexeeyo Soomaalida, haatana muranka xuduudaha ku soo kordhiyey cadaawad qotodheer oo dhinaca diinta ah.

Muddo bil ah ka dib, waxaa tartan loo galay hanashada xilka ugu sareeye qaranka oo ah jagada madaxweynaha, siyaasiyiin tiro badan ayaa isa soo sharaxay, waxaase gebegabadii ku guuleystay cod aqlabiyad lehna helay Kornayl Cabdullaahi Yuusuf Axmad, oon Soomaalida badankeedu fileyn inuu jagadaasi ku soo bixi doono. *“Dhega dheer taan u dhigtayba maahan.”* Markii guddoomiyaha baarlamaanku, mudane Shariif Xassan ku dhawaaqay natiijadii doorashada, wuxuu cod baahiyaha ku soo dhoweeyey madaxweynaha la doortay Kornayl Cabdullaahi Yuusuf iyo tartamihii laga guuleystay mudane Cabdullaahi Caddow si ay munaasabada guusha awgeed baarlamaanka iyo marti sharafta kale dhowr kelmadood ugu soo jeidiyaan.

Waxaa dad badani u dhegtaagayeen bal waxaa caawa Korneyl Cabdullaahi Yuusuf oran doono maadaama ay ahayd maalintii noloshiisa ugu farxad badneyd. Waxaa la yaab noqotay ka dib markii Kornayl Cabdullaahi ku dhawaaqay wax Soomaalida iska daaye xataa shisheeyuhu la yaabay, wuxuuna yiri, “Soomaalidu waa kala dhaqan duwan tahay oo qaar maalintii ayey shaqeeyaan qaarna habeenkii ayey shaqeeyaan, anniguse waxaaan ballan qaadayaa in aan labadaba la shaqeyn doono, **ma jinbaa?** *Isagaa la yiraahdaa habeen iyo maalin toona ma seexo.* Dadka ku takhasusa cilmiga isirka Aadanaha (Ethnologists) siiba kuwa Soomaalida u dhuun-daloola si weynna wax uga qoray, waxay caddeeyeen in Soomaalidu tahay dad isku dhaqan ah, isku luqad ah, isku diin ah. Haddaba hadalka Kornayl Cabdullaahi ee ah Soomaalidu waa kala dhaqan waxaa loo qaatay mid kashifay sir culus oon cidina hore u soo bandhigin.

* **Canshuur qaadow janno jidkeed kuma joogo, cagtana uma jirqooqo !** Haybadda hoggaamiye qaran waxaa ugu horeysa inuu yahay aftaham shacabka u sawiri kara hiiraalle qaran iyo horumar lagu gaaro berrin barwaaqo, waa lagama maarmaan inuu leeyahay cod fasiix ah oo shacabka qiiro gelin kara, waa lagama maarmaan inuu shacabka beerlaxawsan karo been iyo run mid ay tahayba. Haybadda hoggaamiye qaran waxaa ka mid ah inuu hadalkiisa ku dheeho Asleynka (Aayado Qur'aan & Axaadis) si

dadweynaha loogu qushuuciyo diinta islaamka. Cabdullaahi Yuusuf waa bilcaksi, waa afgarooc yaqaan jaajaaleynta iyo googaa-cadaleysiga kaftanka reer Mudug. Hadalkiisu waxaa ku badan xanaf boogaha damqisa, mana yaqaan xubinta hadalka iyo halbeegga hawraarta, waxaa ka dhex muuqda oo laga dhadhansan karaa faan iyo tookh ku salaysan islaweyni qabyaalad cuskan, waxaa ka mid ah eraydaan: “ku dhawaaqista magac qabiil oo caado u ah ka sokow, wuxuu yiraah: *dadka anigaa ugu hub badan, dadka anigaa ugu geesisan, dadka anigaa wax ugu dili og, dagaalkii qaranka dumiyeey anigaa bilaabay iwm*”.

27/08/2000 goortii maamulkii TNG lagu soo dhisay Carta, khudbadii Cabdullaahi Yuusuf ku mucaaraday TNG ee uu ka jeediyey Garowe, si loo qiimeeyo iyo si loo qoro midna lama yaqaan, sababtoo ah Cabdullaahi kalama yaqaan hadalka qof mas’uul ah meel fagaare ah ka jeediyo iyo kaftanka goobaha fadhi-ku-dirirka looga sheekeeyo. Taageerayaasha Cabdullaahi Yuusuf waa inay garwaaqsadaan haddiiba uu xilka bilo ku sii waaro inuu u baahan yahay aqoonyahan diyaariya khudbooyinkisa {Speech writer}. Dhaqaatiirta cilmi nafsiga ku taqasustay haddii ay lafaguri lahaayeen hadallada Cabdullaahi Yuusuf, waa hubaal in loo aqoonsan lahaa nin waalan balse weli aan dhar dhigan. Canshuur qaadow janno jidkeed kuma joogo macnaheedu waxaa weeye, Cabdullaahi Yuusuf kuma taagna toobiyaha taga tubta nabadda iyo taliska madaxtooyada, wuxuuse u eg-yahay dagaal-ooge u dallacay dilaa-sare, sida ku cad murtida gabayga cutubkan bilowga iyo furahaba u ah.

Dowlad la’aanta darteed markii amarkii iyo kala dambeyntii ay luntay, qof kasta sida la quman ayuu u dhaqmay, jaantaa rogan iyo fowdo ayaa nolosha lagu saleeyey. Xumaan kasta oo caqiidada Islaamka iyo caqliga suuban ka horjeeda ayaa dhaqan noqotay. Magaalada Xamar waxaa ka furan idaacad FM ah oo lagu magacaabo **Bariga Afrika**, sida laga dheehan karo barnaamijyada laga baahiyo idaacadaas, waxaa muuqata inay u adeegayso danaha cadowga Soomaalida. Barnaamijyada laga baahiyo waxaa ugu muhiimsan kan “**Isirka Samaale**”, rag isku sheega aqoonyahan ku xeeldheer taariikhda ayaa waxay ku yooyootamaan in bulshadu ka kooban tahay **Samaale iyo Soogalooti**, lagama maarmaanna ay tahay in magaca Soomaaliya lagu beddelo Samaale oo ah hayb-qarameedka {identity} beelaha Irir-Samaale oo iska leh mandaqadda Geeska Afrika. Dulucda iyo ujeedada barnaamijku waa isku soofeyn iyo sii kala irdheyn bulshada iyo abuuris niyadxumo horseeda dagaallo cusub, waa khatar hor leh iyo shirqool cadowgu maleegay oo dalka ku soo fool leh. Yooyootanka idaacadda Bariga Afrika waxaa la mid ah jaajaaleynta Cabdullaahi Yuusuf, maxaa yeelay markii la dhuuxay lana qiimeeyey hadallada Cabdullaahi Yuusuf, waxaa loo fahmay in aysan ahayn murti ka soo maaxatay maskax nin mas’uul ah, balse hadalkiisu inuu jawaab u yahay barnaamijka Isirka Samaale ee idaacadda Bariga Afrika laga baahiyo...

* Taariikhiyan Soomaalidu waxay ahaan jirtay dad islaweyn oo aan qaadan liidnimada, qofka Soomaaliga ah xataa haddii uusan diinta waxba ka aqoon, ma ogola oo dagaal buu ka xigaa in loogu yeero Gaal baad tahay. Cayda ugu fooshxun ee Soomaalidu ka dagaasho waayadii hore waxay ahaan jirtay waxaaad tahay “*Amxaar injir leh iyo Yuhuud tin leh*”. Waa yaabe Kornayl Cabdullahi Yuusuf iyo kooxdiisu waxay si cad oo aan qarsoodi lahayn ugu faanaan waxaan nahay *Kaadir Ethiopia ka soo aflaxay* oo

saaxiibkeen Meles Zanawi ayaa hub iyo hantiba nagu taageera si aan hoggaaminta dalka xoog ugu hanano. Hoggaamiye ku faanaya Ethiopia ayaan kaba-qaad u ahay inuu madaxweyne ka noqdo dalkaan burburay waa inkaar iyo ayaandarro weyn.

Hal booli ah nirig xalaal ah ma dhasho ! Kooxda International crisis group {ICG} warbixinta lambarkeedu yahay 88 oo ay soo sareen doorashadii Kornayl Cabdullaahi Yuusuf kadib, taasoo ay cinwaan uga dhigeen “dagaalka Soomaaliya waa iska sii socon doonaa” {Somalia: Continuation of war by other means}, bogga 5aad ee warbixinta waxay ku qoreen Kornayl Cabdullaahi Yuusuf oo ah **Tabcane Tigree** si uu ugu guulaysto jagada madaxweynaha inuu bixiyey laaluush iyadoo xildhibaan kasta hoosta looga dhiibay \$7.000, todoba kun oo dollar. Warar kaloo laga soo xigtay ilo lagu kalsoon yahay waxay tibaaxeen in laaluushka Cabdullaahi Yuusuf madaxweynaha ku noqday laga bixiyey khasnada dhexee Ethiopia oo weliba Talyaanigu baritaaray.

* Axaddii la doortay laba ayaamood kadib Arbacadii ku xigtay shirkii u horeeyey iyo wada tashi siyaasadeed wuxuu la showray Jeneraal MSXMoorgan, taasina waxay caro karaar dhaaftay ku riday reer Hargeysa iyo guud ahaan Soomaalidii Kacaanku kadeeday, gaar ahaan Isbahaysiga Dooxada Jubba oo tuhunsan in Cabdullaahi Yuusuf Jeneraal Moorgan ka ballanqaaday inuu dib ugu gacan geliyo Kismaayo. 17/10/2004 Kornayl Cabdullaahi Yuusuf markuu 7 ayaamood xilka hayey, wuxuu heshiis dhagar & qiyaamo huwan la galay shirkadda {HAFZA = Horn of Africa Free Zone Authority}, heshiiskaas qodobka ugu khartarsan wuxuu qeexayaa in Gacanka Xafuun oo hodon ku ah kalluunka iyo cusbada muddo 99 sano ah laga kireeyey shirkadda HAFZA. Heshiiskaas oo ah qiyaamo qarsoodi laga dhigay, shabakadaha warfaafinta ee shaaciyey waxaa ka mid ah wargeyska Xog-Ogaal No 4775. Heshiiskaas oo ka kooban 19 qodob oo lagu daabacay 32 bog, waxaa lagu maldahay kiro waqti dheer, balse xaqiiqda dahsoon waxay tahay in Gacanka Xaafuun laga iibiyey shirkadda HAFZA. Warar kaloo lagu kalsoon yahay oo laga soo xigtay reer Gaalkacyo, waxay kashifeen Cabdullaahi Yuusuf tabaabushii doorashada ka hor intii uusan u soo ambabixin Nairobi, wuxuu rag ganacsato ah ka iibiyey xeryihii CQS ee ku yiil deegaanka Gaalkacyo.

Taariikhdu been ma sheegto, lagamana been sheego. Taariikhdu waa mid dhigan, dhambaaley uruurisaa dhacdiyo mid la dhowryaba. Ninkii timir abuura iyo ninkii tiin tallaalaba taariikhda ayaa werin ! Sida aan ku soo xusay cutubka 9-aad, MSBarre wuxuu si geesinimo leh uga diiday shirkadda {CONOCO} inay shidaal ka soo saarto mandaqada Woqooyi-Bari muddo 20 sano ah iyada oo aqoonyahan Soomaaliyeed uusan goobjoog ka ahayn goobaha shaqadu ka socoto. 1970-yadii Jirde Xuseen ayaa iibsaday {Bar Savoy} oo ku yiil bartamaha Xamar, Bar-Savoy dhanka Koofur-Bari waxaa kaga dheganaa dhismaha Xafiiska laga diiwaangeliyo baabuurta iyo warqadda lagu wado baabuurta {driving License}, Xafiiskaas waxaa lagu magacaabi jiray {PRA = Public Registration Automobile}. Taajir Jirde Xuseen wuxuu jeclaystay inuu dowladda ka iibsado dhismahaas oo xilligaas Baraako fool-xun ahaa, qalqaaladii waxaa ka wasteeyey oo arjigii codsiga ka qaaday Cumar Carte Qaalib oo ay u dhaxday ina-Jirde Xuseen, xilligaasna ahaa wasiirka arrimaha dibedda oo MSBarre ay isku fiicnaayeen, gabayadiisii jacburka ahaa iyo qarawgii uu ku sheegi jiray inuu ku riyooday MSBarre oo Soomaaliya ka samatabixiyey aafadii ku habsatay waayadii maamulkii Musuqmaasuqa darteed.

Sidii lagu yiqiin Cumar Carte inta lebbistay suud qurux badan oo ilqabad leh, timahana shanladii rasto ka dhex jeexay ayuu xafiiska madaxtooyada ugu tegay MSBarre oo ku mashquulsan saxiixa warqado xoghayntu soo diyaarisay oo waqtigaas hortaagnayd. Shicir-jacbur Carabi ah oo nuxurkisu ahaa duco balse MSBarre uusan fahmin markuu mariyey, arjigii Jirde Xuseen ku codsanayey in dhismaha PRA laga iibiyo ayuu hordhigay, wuxuuna u raaciyey baryootan iyo hoodo sheegasho uu ku sigtay inuu gondaha qabsado si sodoggi looga iibiyo dhismaha PRA. MSBarre caro darteed sigaarkii laba-laba ayuu u shitay, dhowr fijaan oo qaxwe {coffee} ahna waa cabay, wuxuuse Cumar Carte ugu jawaabay “Digtatoor dembiyo badan galay haba laygu sheego, laakiin lagama yaabo dhismo qaranku leeyahay inaan shaqsi ku wareejiyo”. MSBarre isla markiiba wuxuu amray Baraakadii PRA in 5 dabaq looga dhiso xarunta wasaaradd maaliyadda. Arjigii Jirde Xuseen ee Cumar Carte ka wasteeyey iyo tuhun kaloo jiray darteed iyadoo laga shakiyey in Cumar Carte sidii ina-adeerki Axmed Yuusuf Ducaale 1967kii markuu ahaa wasiirka arrimaha dibedda uu u iibsaday qadiyadda xorayntii Jabuuti oo kale in Cumar u iibsado qaddiyadda xoreynta Soomaali Galbeed, intii aan dagaalkii 77 si rasmi ah loo bilaabin ayaa Cumar Carte laga qaaday xilka wasaaradda arrimaha dibedda, waxaaase lagu beddelay Cabdiraxmaan Jaamac Barre oo ahaa doqon ku guuldaraystay xilkii loo dhiibay.

Dabayaaqadii 1980-yadii Jeneraal Maxamed Faarax Xersi “Gacmogooye” ayaa shil baabuur ku geeriyooday wuxuu ahaa sarkaal firfircoon oo hanaqaadka Kacaankii Oktoobar hawl badan ka soo qabtay. Afadii Jannanku ka geeriyooday oo ay baritaarayaan qabqablayaasha beesha Mareexaan ayaa xafiiska madaxtooyad isku shubay, waxay MSBarre ka codsadeen in agoonta laga iibiyo dhul yar oo beri ahaan jiray xafiiskii horee Rugta Ganacsiga, kuna yiil dhabarka dhismaha weyn ee dowladda {Ufficio Governo}. Arjigii ayaa la hordhigay, waxaa loo sharxay Jannanka xijaabtay inuu ahaa halyey abaal lama iloobaan ah ku leh Kacaanka, waxaa laga codsaday agoonta in taagero iyo wax-u-qabasho looga dhigo dhulkaas yar oo laga iibiyo. MSBarre intii uusan u jawaabin, wuxuu u yeeray Jeneraal Jaamac Badwi taliyihii hoggaanka dhismaha Boliiska, kooxdii dhulka doonaysay oo xaadir ah, si ay u quustaan wuxuu amray in goobtaas laga dhiso Laanta Lacagaha Qalaad ee Bankiga. MSBarre oo diiday inuu dhul yar ka iibiyo shaqsi Soomaaliyeed, inuu beddelo Cabdullaahi Yuusuf oo degmo dhan shirkad shisheeye ah ka iibiyeey waa ayaandarro weyn oo Soomaali ku dhacday. *Nabee waa loo darsaday duqii dacayda weynaa !*

* Waayadii hore Soomaaliya waxaa ka jiri jiray dariiqooyin diimeed sida (Qaadiiriya, Axmeddiya, Saalixiya iwm) sannadahaan dambe waxaa ku soo biiray dariiqooyin cusub sida (Al-Islaax, Al-Itixaad, Selefiya iwm) hasa ahaatee sheekada Kufaartu faafiyaan ee oranaysa Soomaaliya waxaa jooga Al Qaacida waa been abuur aan beyd run ka ahayn. Kornayl Cabdullaahi Yuusuf oo lagu xanto askeri aan aa-aaska diinta waxba ka aqoon isla markaana doonaya inuu raalli geliyo cadowga Islaamka, mar kasta iyo madal kasta wuxuu ka sheegaa oo afkiisu ku diir beelay Soomaaliya waxaa jooga Al Qaaciido iyo argagaxiso ee adduunku ha na siiyo ciidan aan ku burburino. Meeshaad qof ka qaado qof baad uga tagtay, hal-hayska Cabdullaahi Yuusuf ee ah waxaaan u baahan nahay ciidan shisheeye oo lagu dabargooyo argagaxisada iyo Alqaaciidada Soomaaliya, wuxuu caro

geliyey Soomaalida damiirka wanaagsan iyo inta diinta ehelka u ah. Iyadoo aan lagu martiqaadin ka mid noqoshada Huwanta isku magacaawday la dagaallanka argagaxisada balse dantoodu tahay dabargoynta Muslimiinta, Cabdullaahi Yuusuf wuxuu u tafaxeytay oo heegan ugu jiraa inuu xubin firfircoon ka noqdo xulufada Washington laga hago ee ku bahawday la dagaallanka Muslimiinta.

* Si qaldan oo qar-iska-tuurnimo ah wuxuu yiri, Somaliland & Puntland waxay leeyihiin ciidan habaysan oo iyaga hubka laga qaadi maayo, laakiin Koofurta Soomaaliya (Hawiye) ayaa la doonayaa in hubka laga qaado oo maskaxda laga beddelo. Hadalkaas Hawiye wuxuu u arkay Cabdullaahi Yuusuf inuu yahay askeri ma naxe ah oo weliba aarsi doon ah, taasina waxay horseeday in Hawiye hubkisa aasto oo weliba keyb-la-yuurar iyo sutigaashaan galo. Maxamed Xaaji Aadan oo ka mid ah siyasiyiinta Puntland ayaa laga soo xigtay erayadaan “Cabdullaahi Yuusuf waagii hore wuxuu ahaan jiray *buro-kansar ah* oo ku taal Majeerteen, ayaandarro hadda wuxuu noqday belaayo madow oo ku baahday berrin kastoo udub aqal Somaliyeed ka mudan yahay. Cabdullaahi Yuusuf saddex dhaqan oo xun-xun: *aargoosiga, qabyaaladda iyo xukun jacaylka* wuxuu kala mid yahay MSBarre inta kalena waa kaga sii xun yahay” Cabdullaahi Yuusuf wuxuu uurka ku qarsan waayey oo afku ka xaday aargoosiga uu damacsan yahay, wuxuu meel fagaare ah ka yiri: markaan Xamar la tago ciidan Majeerteen iyo Tigree iskudhafan ah, Hawiye badan waa ku calaacali doonaa “Abbaanow anigu kuma jirin dilkii iyo bililiqaysigii Daarood loogu geystay Koofurta 1991-92”. Damaacsi waa riyo maalmeed iyo rejo meehanaw aan sinaba u suurtagaleyn oo haatan Soomaali si fiican bay sannadahan isu baratay.

* Waayadii Soomaalidu ku nooleyd miyiga waxay lahayd lebbis lagu yaqaan, saddex kooxood keliya ayaa loo ogolaa inay madaxa dedaan oo maro ku xirtaan: hoggaamiye dhaqameed, culumada & haweenka la qabo. Dhaqankii horee suubanaa, xeerka Biri-mageydo waxaa lagu qeexay saddexda duubka leh lama dilo, oo waxaa looga baqaa: caro Eebbe, cuqubo iyo ceeb. 1930-yadii kadib markii baadiyaha laga soo dagaagay ee beled la yimid, dhaqan doorsoon iyo isku dhex yaac ayaa ku dhacay reer magaalkii waxayna la yimaadeen hab-dhaqan cusub. Raggii wuxuu u qeybsamay saddex: caami-duub leh, caalim-faasuqa iyo cirroole-caasiya. Sidoo kale haweenkii waxay u qeybsameen saddex: carmal-tima-daban, cajuuso-cillaan leh iyo carruur shaash leh. Wadaad iska yeel aan diinta waxba ka aqoon oo ah caami-duub leh ayaa lebbistay qamiis-cad, cimaamad iyo koofiyyad, dabadeed wuxuu u xoolo doontay miyiga, si xushmad leh ayaa loo soo dhoweeyey oo waxaa loo qaatay sheekh weyn oo asaleynka (Qur’aanka & Axaadista) dusha ka yaqaan. Ka haybaysi iyo karaameyn darteed, waxaa lagu sharfay inuu salaada subax dadka tujiyo oo jameecada iimaam u noqdo, isna waa yeelay, balse aqoondarro darteed salaaddii subax wuxuu ka dhigay afar rakcadood, sababtoo ah weligiiba hal mar ayuu salaad casar wax ka tukaday oo wuxuu u fahmay in salaad kasta afar rakcadood tahay. Jameecadii ayaa ku tiri sheekh waad sahwiday ee mar kale aan salaadda tukano oo ku noqono. Wuxuu ku jawaabay saaxi baan ahay oo weligay ma sahwin. Waxaa lagu yiri hadde sidee wax u jiraan salaadda subax waa laba rakcadood, adiguna waxaad na tujisay afar rakcadood? Caamiga duubka leh oo ahaa jaahil xoog leh wuxuu yiri, **afar wax lagu waayey laba laguma doono ee edeb yeesha.** Haddaba Cabdullaahi Yuusuf inuu sidii caamigii duubka lahaa yiraah, wax xoog lagu waayey xeelad laguma doono oo sidii lagu

yiqiin wax walba xabad iyo xoog ku xaliyo iyo inuu is beddelo oo noqdo oday ummadda tabaalaysan u horseeda dib-u-heshiisinta iyo horumar ha laga dhursugo labada midda maamulkiisu ku dhammaado.

* Muhandiskii qaraabo-kiilka iyo macalinkii qabyaaladda MSBarre, shaqaalaha ku meersan walow ay u badnaayeen Mareexaan nabadgelyada qaabilsan, haddana waxay ahaayeen isku-dhaf Soomaali-weyn ka kooban. Jagada afhayeenka warfaafinta madaxweyanah waxaa iska beddelay Cabdi Xaaji Gabdoon, Yaasiin Xaaji Ismaaciil iyo Axmed Xasan Cowke. Laga soo bilaabo 1965kii markii MSBarre laga dhigay taliyaha XDS waxaa darawal u ahaa Cabdi Madoobe (Majeerteen) waagii dambena wuxuu u dallacsiyey G/Sare la wareegay xilka *Aide Camp*. Kornayl Cabdullaahi Yuusuf shaqaalaha ku meersan 100% waa Majeerteen u badan jufada reer Mahad, wargeyska Codka Xorriyadda ee ka soo baxa Kaaraan ayaa qoray maqaal ciwaankisu ahaa Cabdullaahi Yuusuf ma madaxweyne Soomaaliyeed baa mise waa Malaaq Majeerteen? Wadaad baa yiri, jaahil janno jidkeed kuma joogo, naxariis Eebbena uma jeelqabo. Cabdullaahi madaxweyne Soomaali midayn kara uma muuqdo, saanqaadkeed iyo sansaankeedna maleh.

* Belaayada ka soo higleh Mataanaha Mudug waxaa sii odorosay MSBarre. Maamulkii MSBarre waxaa laga dhaxlay burbur iyo barakac baaxad weyn, kaasoo la hubo inuu dhacarsan doono jiilka dambe qarniyaasha soo socda. 1990kii markii maamulkii MSBarre ku soo uruuray caasimada, gobollada oo dhan dagaalladii sokeeye ku baaheen oo dab ka holcay, ayaa koox Mareexaan ah oo xilligaas naf-la-caari ahayd waxay madaxtooyada ugu tageen MSBarre oo faraxsan wax shido ahna aysan wejigiisa ka muuqan. Welwelka kooxda iyo dareen la'aanta MSBarre liddi bay isku ahaayeen, kadibna waxay ku calaacaleen, “waxaad tahay hoodo-laawe hadimo noo abuuray, Soomaaliya meel xun baad dhigtay, Mareexaanna waxaad u beertay godob mugweyn, adiguna taariikh madow ayaad leedahay oo lafahaaga ayaa la gubi doonaa”. MSBarre oo dhoollacadaynaya ayaa ugu jawaabay kooxdii welwelsanayd, “waxaad tihiin maangaabyo aan baaxa-degga siyaasada beydna ka aqoon, saadaasha siyaasadda waxba kama taqaaniin, sida aad wax u odorosteen arrimaha mustaqbalku waa ka beddelan yihiin”

MSBarre wuxuu kooxdii ugu caqli celiyey in wax walba si wanaagsan ku dhammaan doonaan, wuxuu hadalkiisii ku soo afjaray “Mareexaan wax eed ah looma qabsan doono, waxayna ahaan doonaan *asharaaf ixtiraam mudan*, anniguna waxaan noqon doonaa *halyey qaran oo haybad leh*”. Kooxdii oo yaaban ayaa MSBarre weydiisay oo sideebay taasi ku suurtoobi doontaa? MSBarre wuxuu ku jawaabay, mustaqabalka waxaa imaan doona rag iga naxariis daran oo wixii dhibaato Kacaanku geystay sii kun-jibaari doona, waxaana lagu calaacali doona Kacaankii MSBarre waa loo darsaday. MFCaydiid iyo Cabdullaahi Yusuf Axmed oo hadda jabhad qabiil hoggaamiya ayaa gadaashay imaan doona, waa hubaal gaboodfalka ay geysan doonaan inuu taariikhdayda qurxin doonaan, duntooda iyo dirkooda ayaan aqoon fiican u leeyahay waxay Soomaaliya u horseedi doonaan halaag baaxadweyn”. Wixii xumaan Mareexaan falay waxaa fasaqi doona xumaanta Mataanaha Mudug fali doonaan, wixii xumaan MSBarre falayna waxaa fasaqi doona xumaanta Saaxiibada Mudug samayn doonaan. Waxaa muuqata saadaashii

MSBarre inay rumowday oo rag ka arxamdarran ay gadaashi yimaadeen, walow dhibaataada inteeda badan MSBarre beeray, lamana dafiri karo inuu Soomaaliya meel xun uga tegay.

* Goortii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan ku geeriyooday Iimey 21/12/1921kii, sidii dawgu ahaa looma sameyn tacsii iyo baroordiiq heer qaran ah. Wuxuu mudnaa oo la filayey in loo maamuuso geesi qaran ka geeriyooday, taas beddelkeeda gabayo digasho iyo aflagaado ah ayaa loo tebiyey, waxaa ugu foolxumaa tuducyada hoose:

**Hadda ayuu galayr-yeynayaa gego habaas weyne,
Hadda ayuu garuumaynayaa gabadh islaameede,
Waxaad geeri moodeen amuu yare gamaanyooday,
Wadaadkii gunaanadi lahaa amuu yaraha guulguulay,
Waatey Alleba kala go'een geeri ka horowe,
Sidee aakhiro ugu galbaday doqonsanaa gaalku ...**

Gabaygaas iyo kii Calidhuux ee ahaa **“Waa lagu digtaa duul hadduu ku darnaan jiraye, bal dayooy wadaadkii wakaa sii dabayshadaye”**, waxay noqdeen wax foolxun oo ka baxsan dhaqanka suuban ee Soomaalida iyo guud ahaan shareecda islaamka, waxayse gabayadu ku salaysan yihiin murtida oranaysa: Rag hadduu coloobo marka hore wuxuu ku kala cad goostaa ciraabta gabayga, dumarna hadduu coloobo marka hore waxay ku kala cad goostaan caytanka suuqa. Waxgaradkii sebenkaas noolaa iyo culumada diinta ayaa ka shiray gabayada aflagaadada iyo jeesjeeska ah ee marxuumka loo tiriyey, kadibna waxaa la xilsaaray (Ahlu caqli & wal qiyaas) culumada laga xulay. Guddigii la xilsaaray markay qiimeeyeen taariikhda Sayidka, sidii uu gobanimada ugu halgamay iyo jahaadkii uu Gaalada kala hortegay, waxay qiyaaseen in Sayidku ahlu janno yahay, sababtoo ah bay yiraahdeen ciilkii uu Gaalada baday ayaa dembigiisa dabooli, Insha-Allaah.

Sidaas oo kale goortii MSBarre Lagos ku geeriyooday 03/01/1995, siyaabo kala duwan ayaa wax looga sheegay, hurgumadii laga dhaxlay Kacaankii Luggooyo ayaan boogtisu weli bogsan. Degmada Xamar-jadiid, xaafadda Cali Kamiin, maqaayad ku taal dad fadhiyey ayaa markay BBC ka dhegaysteen in MSBarre xijaabtay waxay ku duceeyeen Allow u naxariiso oo jannatul firdowsa ka waraabi. Mooryaan reer Hobyo ah ayaa dadkii rasaas aan loo miidaan deyin ku furay, dadkii goobtaas lagu xasuuqay waxaa ka mid ahaa Axmed Cali Geelle oo ah reer Caabudwaaq, balse hooyadi reer Hobyo tahay. Axmed Cali Geelle wuxuu ahaa Biri-ma-geydo kulansaday: magan, inaan la yaal abti loo yahay oo inta la dilo ka reeban.

Qof islaam ah oo dhintay in lagala baqaylo naxariista Eebbe waa arrin foolxun oo hidde dhaqanka Soomaalida ku cusub. Reer Muqdisho mashaqadii dhacaday waxay u xilsaareen guddi (Ahlu caqli wal qiyaas) bal inay soo iftoodaan oo go'aan ka soo gaaraan aayaha MSBarre. Guddigii la xilsaaray markay daraasad ku sameeyeen hab-dhaqankii MSBarre iyo sidii Kacaanku ula macaamilay Mataanaha Mudug, waxay qiyaaseen MSBarre Insh-Allaah inuu ahlu janno yahay, taasna wuxuu ku mutaystay aqoontii durugsanayd ee uu u lahaa Mataanaha Mudug, siiba xarigii MFCaydiid & Cabdullaahi

Yuusuf. Markii la arkay hab-dhaqanka dugaagii ka dambeeyey MSBarre, waxaa loogu duceeyey in naxariista Eebbe daboosho dembigiisa, raxiimullaah. Doorashadii Cabdullaahi Yuusuf kadib, qof kastoo xusa magaca MSBarre, xataa reer Hargeysa, waxay ku duceeyaan Alle ha u naxariisto MSBarre.

MFCaydiid iyo saaxiibki Cabdullaahi Yuusuf oo ku xiran xabsiga Mandheera, odayaal iskudhaf ah oo reer Mudug ah ayaa 1973kii madaxtooyada kula shiray MSBarre, waxay ka codsadeen inuu labada sarkaal xabsiga ka sii daayo. MSBarre oo ahaa nin codsiga odayaasha dhaqanka tixgeliya wuxuu la kulmay laba kala darran lagu dooransii, inuu codsiga odayaasha diido way ku adkaatay isla markaana inuu labada sarkaal sii daayo iyaduna way ku adkaatay. Wuxuu odayaashii u sharaxay sababta labada sarkaal ku xiran yihiin, garaawshiyo ku salaysan mataan-bowleyn iyo madax-salaax kadib, wuxuu yiri: “MFCaydiid naftayda ayuu halis ku yahay oo aan uga baqay, Cabdullaahi Yuusufna qaranka ayuu halis ku yahay oo aan uga baqay, sidaas ayey xabsiga ku mutaysteen”

MSBarre wuxuu ahaa oday wax og oo loo waxyooday, saadaashiisii ahayd Cabdullaahi wuxuu halis ku yahay qaranka, waxay dhab noqotay dagaalkii 77. Kornayl Cabdullaahi Yuusuf waxaa taliye looga dhigay ciidankii ka faltamay aagga Baali & Sidaamo, iyadoo guluf weerarku habsami ku socdo oo Soomaalidu gacanta sare leedahay, Cabdullaahi wuxuu joojiyey weerarkii ciidanka Soomaalidu ku hayey ciidanka Xabashida, wuxuu xiriir hoose la yeeshay saraakiil ay isku hayb ahaayeen waxaa ka mid ahaa Kornayl Maxamuud Sheekh Cismaam “Cirro” oo isna ahaa taliyaha guud ee saadka iyo taakuleynta CQS, waxay ku heshiiyeen inay ka shaqeeyaan sidii Soomaalidu dagaalka ugu jabi lahayd oo Ethiopia u guulaysan lahayd. Dhowr sarkaal oo reer Woqooyi-Bari ah ayaa mas’uul ka ahaa guuladarradii dagaalkii 77. Ujeedada shirqoolka loo abaabulay waxay ku jaango’nayd laba arrimood, waa tan horee haddii Soomaali Galbeed la xoreeyo, waxay is tuseen in MSBarre noqon doonaa halyey qaran oo haybad leh {Napoleon Bonaparte}, waa tan labaade waxay is tuseen israaca Soomaaliweyn xor ah inuu halis ku yahay haybadda iyo gacansareynta siyaasadeed ee beesha Majeerteen.

Hagartii iyo jallaafadii dagaalkii 77, isku-daygii afgembigii 09/04/1978, aas-aaskii SSDF & Radio Halgan, qabsashadii Balanballe & Galdogob, hagar la’aantii hiil iyo hooba Ethiopia ku taageertay in Cabdullaahi Yuusuf noqdo madaxweynaha Puntland iyo madaxweyanaha jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo sidii Ethiopia ugu taageertay inuu jalbaha dhulka u dhigo maamulladii ay madaxweynayaasha ka ahaayeen Cabdiqaasim Salaad Xasan iyo Jaamac Cali Jaamac iyo codsiga Cabdullaahi Yuusuf ee ku wajahan in ciidan Itroobiyaan ah faragelin ku sameeyo Soomaaliya, arrimahaas iyo kuwa kaloo dahsoon marka laysu geeyo waxay muujinayaan tuhun salballaaran oo dulucdiisu tahay in Cabdullaahi Yuusuf weligi ahaa jaajuus Ethiopia ku dhex leedahay saraakiisha Soomaalida.

Marnaba yaan loo qaadan inaan ahay qareen difaacaya dunuubtii MSBarre Soomaali ka galay, waxaaan qorayaa oo keliya inay yimadeen rag ka naxariisdaran kun jeer. Marka furuq yimaado waraabow waa faro ka leef. Reer Harar ayaa ku mahmaaha: haddii Amxaar la arko, Faranji waa Xaaji. Wadar jeer waxaan ku celceliyey MSBarre inuu

mas'uul ka yahay inta badan dhibaataada Soomaaliya hadda ka taagan, sababtoo ah isagaa maamulka qaranka u rogay qabyaalad qaawan iyo qori caaradi, isagaa tallaalay turxaanta iyo kala tagga Soomaalida. Qofkii shar iyo khayr kala doortay waxba kalama dooran, laakiin qofkii laba sharood kala doortay ayaa runtii wax kala doortay. Caafimaadku waa shayga ugu fiican ee Alle bixiyo, haddii laga fursan waayo oo cudur ku asiibo, kolley cudurka qaaxadu waa ka roon yahay cudurka Kansarka. Sidaas awgeed marka la qiimeeyo hab-dhaqanka hoggamiye kooxeedyada iyo raggii u hanqaltaagay jagada madaxweynaha, waxaa la oran karaa maamulkii MSBarre wuxuu ahaa qaaxo halis ah, waxaase dabi yimid Kansar aan dawo lahayn.

Waxaa taagan qofkaan garan ma garto waxaa soo socda, xagga garashada Eebbe dadka kama simin, waxaa jira qof saadaalin kara mustaqabalka waxaa dhici doona, sida qaalibka ah gabyaagu wuxuu leeyahay *Ilhaam* ay wax ku odorosaan. Gabyaa lagu magacaabo Nuux Saciid Naxar (reer Xaafuun) oo ilaaliye ka ahaan jiray daarta Baarlamaankii hore ayaa horaantii 1990kii la yaabay carcarta mushkiladdii bilaawga ahayd ee nuxurkeedu ahaa: (qabiil ku bururka, kursi u qooqa, qarannimo diidka, qabyaalad jacaylka, xasadka, dhabar-ka-wareenka, is-naca, sohdimaha qabiilka iyo seero beeleedka). Gabyaa Nuux oo ka tiiraanyeysan belaayada soo higleh ayaa hanuunintii maalinta Talaadada loo qaban jiray shaqaalaha dowladda ka tiriyeey gabay taariikhi ah, wuxuu ku maansooday:

Sabca iyo sabciin baan jiraa maalmo saa'ida'e

Suugaanta maansadana hantiyey sa iyo wowgeede,
Waxaaan saxay waxaaan saadiyey iyo waxaan samayn doono,
Aan sawiro bal maantana halkaan saanta dhiganayno,
Soddon sanaba qaran baan ahayn calan u saaraaye,
Saldanadiina adkaystaan lahaa yaan la saabiline,
Saracadaan lahaa labada webi dooxadaan sare'e,
Soomaali sidii aan la rabay diiday samahiiye,
Saluugtoo midnimadii nacdaye hoog ma wada saaqay,
Waa maxay sawaxaankiyo haddaba salawga yeeraaya?
Su'aashaa jawaabteeda sugan sidatan weeyaane,
Soddon qaad rasaastiis aan sinaba loo waayin,
Saqiir iyo toban jirkiinii sitaad nabad sugaysaane,
Safar la laayiyo naflahaan salashay laabtiisu,
Sanaadiiqda lacagta laga buuxiyee dibedda loo saaray,
Saqiir ooyi hooyada sawaxi oday gacamaha sayrin,
Sirqa baahan dhalinyaro sahwiday oo gaajo ay solatay,
Suuq ololay beesada sabayn aan qaar indhaha saarin,
Saraha dabaqa dheer Laanguruus nimanka saanyooday,
Safkayaga dhergaaya oon bulshada eegin siliceeda,
Seedaha sokeeyaha is jaray nabadda seerowday,
Sulfaha dhacay abaaraha sanqaray waxaakan sooyaamay,
Saddex Allifle Jannankii ka biqi yeyna soo maraye,
Sababaha dhibaataadan ku timid waa la soconaaye,
Soomaaliyey Kitaab beenah baa saan inoo galaye,

Saatirkeenna ma loo noqonayaa weyna saamixiye,

Sugaanta meeshaan la rabay waa nigaa sugaye,
Siyaadkaa noo sareeyiyo intuu sahanku noo muuqdo,
Saxiixiisu intuu soconayaan siinad leenahaye,
Haddaan siigo kicin maalintuu talada siidaayo,
Haddaan lagu sallidin raggaan u nixin shacabka Soomaali,
Haddaan saanad culus laysla dhicin Xamarna saaltaynin,
Sacabada haddii ayaan dhigan taajirradu suuqa,
Niman sarara weynaa hadeyan saxar ka sii dhuuban,
Sagaal goor hadaan laga darraan kaa na kala soocay,
Siyaadow, Siyaadow haddaan waaya lagu suuxin,
Soo celi Allahayow haddaannu noqonin sowdkiinu,
Soomaali wacal baan ka ahay ee saa ha la ogaado....

Axmed Kuukay oo Xeer-Ilaaliye ka ahaa MBD isla markaana ka mid ahaa dadkii dhegaysanayey maalintii hanuuninta gabayga Nuux, wuxuu ii sheegay markuu gabayga dhammeeyey inuu jidbooday oo ilmeeyey. Fiintu waxay ka oydaa fidnada soo socota, galawgu wuxuu sheegaa waxaan dhicin balse dhici doona.

Sheeko oraaheed kutiri-kuteen ah, waxaa la sheegay dhowr qarni ka hor wabiga Shabeelle nawaaxiga degmada Afgooye waxaa ku noollaan jiray yaxaas-weyne fariistay hilo-wabi, wuxuuna hallakeeyey dad iyo duunyo wixii ka soo ag-dhowaaday biyaha wabiga. Nafley oo dhan markay ka quusteen biyaha wabiga, shir waxgaradku u dhan yihiin waxaa lagu go'aamiyey in yaxaas-weyne maalin walba loo qalo dibi baad ah. Heshiiskii dhexmaray waxgaradka iyo yaxaas-weyne muddo ayaa lagu caano-maalay oo wax dhibaato ah aysan dhicin, dad iyo duunyo si xorriyad ah ayaa biyaha looga dhergay.

Dabcan dadku waa damaaci, laxawjeclo darteed waxaa la masuugay dibigii baadda ahaa, waxaa la gorfeeyey taladii biyaha wabiga lagu cabi lahaa iyadoo aan wax baad ah la bixin. Waxaa la shiriyeey raggii maalinta darran loo irkan jiray taladooda, falanqayn iyo dood dheer kadib waxaa la go'aamiyey qiime kasta ha qaadatae in yaxaas-weyne la dilo oo laga xoroobo amar-ku-taaglayntiisa. Boqol barbaar oo waran iyo gaashaan ku hubaysan ayaa beelaha laga xulay, waxaana loo xilsaaray inay yaxaas-weyne madaxa ka jaraan, loona babacdhigo halista ka imaan karta.

Walow dhowr nin uu hallakeeyey lana haleelay saynta iyo micida, ugu dambeystii waa laga guulaystay oo waa la dilay yaxaas weyne. Dadweynihii oo aad u faraxsan ayaa ciyaar iyo raynrayn la damaashaaday, waxay quudaraynayeen baad la'aan in biyaha wabiga laga haqab-beeli doono oo belaaayo oo dhan waqtigeedii dhamaaday. Waxaa soo ifbaxay arrin aan markii horeba talada lagu darin, yaxaas-weyne dibiga loo qalo markuu laba xubnood ka cuno (garab iyo sarar) hilibaha soo hara wuxuu siin jiray koox yaxaasyo ah oo wabiga ku la noollayd. Dilkii yaxaas-weyne, maalin kadib waxaa loo arooray hilo-wabi, ayaadarro waxaa weerar soo qaaday 30 yaxaas oo aan hore loo arki jirin oo mid waliba doonayo in kaligi loo qalo 3 dibi oo baad ah. Dibigii yaxaas-weyne loo qali jiray

ee la masuugay waa boqol jibaarmay, wuxuuna noqday 90 dibi, calaacal iyo Allow yaxaas-weyne maxaa loo dilay ayaa lagu waashay.

Sheekada sare waxay la mid tahay halgankii hubaysnaa ee lagu qaaday taliskii MSBarre. Oktoobar 1969 illaa Luulyo 1976 MSBarre wuxuu ahaa hoggaamiye qaran oo haybad leh, dalkuna hormar lixaad leh ayuu sameeyey, balse aas-aaskii XHKS 1976kii wixii ka dambeeyey MSBarre wuxuu noqday hoggaamiye beeled, dastuurka dalka lagu maamulo waxaa laga dhigay gabaygii *Ergo Daarood*, qaraabo-kiil iyo qabyaalad qaawan oo lagu faano ayaa la dhaqan geliyey. Qabyaaladdii MSBarre ka soo bilaabay Irir iyo Daarood waxay ku biyoshubatay loollan dhexmaray labadii bahood (Khadiijo & Dallaayad) ee MSBarre, waxaa iska horyimid Ayaanle MSBarre oo ahaa RW dahsoon iyo Maslax MSBarre oo ahaa taliyaha XDS. Markii la xamili-waayey kadeedkii iyo amar-ku-taaglayntii, maamulkii MSBarre waxaa ka horyimid mucaarad hubaysan, ugu dambaystii 26/01/1991kii waxaa lagu guulasytay in MSBarre madaxtooyada laga saaro, waxaa la rejaynaayey in dhibaato oo dhan laga bixi doono. Gees-ka-gees guud ahaan dalka oo dhan goobaha lagu caweeyo iyo fagaarayaasha lagu dabbaaldego waxaa isugu soo baxay dadweyne faraxsan, rag iyo dumar isu jiibinaya ciyaaraha waxay ku heeseen:

Dheg-dheer dhimatoo dhulkii waa nabad,
Dhul-gub dhoofyoo dhulkii waa nabad,
Xornimo dhalatoo dhulkii waa nabad,
Dheregi timidoo dhulkii waa nabad,
Dhiilahaan culanoo dhulkii waa nabad,
Dheefta loo simanyoo dhulkii waa nabad,
Dhibaato hartoo dhulkii waa nabad,
Dhiig-miirad tegyoo dhulkii waa nabad,
Nabadi dhalatoo dhulkii waa nabad,
Dhacadiid ku gamoo dhulkii waa nabad !!!

Ayaandarroi muddo gaaban kadib wax walba bilcaksi ayey isu beddeleen, midnimadii dalka ayaa muran gashay, hashii maandeeq waa la qalay nin cagaf helay iyo nin calool helayba waxaa loo codeeyey in ceeriin lagu cuno hilbaha maandeeq, gees-ka-gees waxaa laga naadiyey dowlad gobolleed iyo guurti baarlamaan lagu sheegayy. Sannad kadib markii MSBarre Xamar laga saaray waxaa ku herdamey Cali Mahdi iyo MFCaydiid, dabadeed waxaa lagu waashay “Salaamullaahi Calal Xujaaj”, yaxaasyadii khatarta ahaa ee MSBarre xabsiyada ku hayn jiray ayaa oodda so jabsaday, waxaa soo ifbaxay 30 hoggaamiye kooxeed oo mid kasta ku hadaaqayo “*waxaan doonayaa inaan caano baqal cabo oo aan carrab yaxaas cuno ee mar i dhaha madaxweyne*”. Faraxdii dadweynuhu siima waarin, heestii ahayd *dheg-dheer* dhimatoo dhulkii waa nabad waxay isu beddeshay ridmo bilcaksi ah:

Belaayaa dhacdoo dhibkii badayeey,
La kala dhimayoo dhibkii badayeey,
Dhiig-badani qubayoo dhibkii badayeey,
Dhalaankii jalayoo dhibkii badayeey,
Wayeel dhacanyoo dhibkii badayeey,

Madfac baa dhambaloo dhibkii badayeey,
Qaxooti loo dhurayoo dhibkii badayeey,
Dhismihii burburyoo dhibkii badayeey,
Dowladi ma dhisnoo dhibkii badayeey,
Dhagarqabay isu dharanayoo dhibkii badayeey,
Na kala dhufsadoo dhibkii badayeey,
Dhuun-weyne ka darnoo dhibkii badayeey !!!

Janaayo 1991kii markii MSBarre Xamar ka baxay Abshir Bacadle ayaa tiriyeey gabay raynrayn ah hase ahaatee sannadguuradii 1992 mar kale wuxuu tibaaxay in MSBarre laga sii daray, wuxuuna ku maansooday:

Duqii hore maxaa loo eryoon kula dagaaleynay,
Dalkii iyo dadkiyo diintii buu dumiyey sow maaha,
Digtatoornimuu keenay iyo dulun cad sow maaha,
Ka daroo dibi dhal-baan aragnay iyo furuqyo daacuune,
Nin walbow walaalkaa dad qala haw durbaan tumine,
Yaan laydin dabargoyin qabiil dowlad noqon waaye,
Qolana qolo ma dabargoyin kadhee weysku daganteene,
Ayax bililiqaa nagu dagoo diirtay beledkeenna,
Duqii doona ducana ugu dara waadna dilateene,
Allow yaa inoo diga markaan duqa ku yaacaynay,
Allow yaa inoo diga markaan deriska riixayney,
Allow yaa inoo diga markaan dacarta beerayney,
Allow yaa dabaadiga hariyo degelka noo caynsha,
Allow yaa dabkoo idil ku rida dowlad gacanteeda,
Allow yaa dagaallada ahliga dib uga waantooba,
Allow yaa mar kale daawada deris walaaloobay,
Allow yaa dalkoo nabadgelyaa diinta ku hoggaansha,
Allow yaa dersiga muqadiska ah dib ugu soo laabta,
Allow yaa difaaciyo amniga dhidibadu u duuga,
Allow yaa daroogiyo qabiil inaga daaweeya,
Allow yaa dariis ciidan iyo dowlad mar u jeeda,
Dib wax ugama sheegeen askeri daa'in abidkeeye,

Ninkaanse dhiigga daadanaya damaaqin yeelkiisa,
Rabbi hibadu ugu deeqay bay dacar ku beereene,
Gubey kaga daydeen oo dulmi bay derejo moodeene,
Afartaa qabiil nimuu dishoo dudaya haw sheegin,
Danta guud nimaan eeginoo doqona haw sheegin,
Dalka nimaan u dhalan kuma duxdee duulow haw sheegin,
Dad-qal dib-u-heshiisinta neceb dulucda haw sheegin,
Nimaan diin lahayn iyo dabley dirirsan haw sheegin,
Murti nimaan da'deed gaarin iyo ducufu haw sheegin,
Afar-jeeble deyn hore cunoo dabacsan haw sheegin,
Digtatoor dan gooniya watoo durugsan haw sheegin,

Dambarkeeda nimaan maali jirin dowlad haw sheegin...

Agoosto 2000, dowladdii lagu soo dhisay Tuulada Carta ee Cabdiqaasim Salaad Xasan madaxweynaha ka ahaa, markay Xamar soo cagadhigatay cayayaan tiro badan ayaa ku kacay, waxaa ka hor yimid dagaal-oogayaashii dalka qeybsaday, nin ka mid ah hoggaamiye kooxyeedyada ayaa yiri *“hadday bir tahay waan raacaynaa, haddayse bac tahay waan jeexaynaa”*. Abshir Bacadle oo la yaabay hab-dhaqanka Soomaalida ee nuxurkisu yahay in wax kasta la mucaarado, ayaa arrintaas ka gabayey wuxuu ku maansooday:

Haddaan kii hore diidnay

Cali kiish-yarena diidnay

Oda Koofina diidnay

Kitaabkii Allena diidnay

Kan la doortayna diidnay

Hal Xamiid Karasaaya ???

Oo Kalifoorniya jooga,

Oo Kirishto jeebka ku haysta,

Oo Kufaar Muslim sheegta ah,

Oo Ey koor leh wataa,

Naloo keeni rabaaye,

Kartideeda lahaada,

Waa laydiin kari-waayee,

Shirib: Keennii haddaad karaahsateen,

waa la keenay Keenadiid labaad...

(MSBarre)

(Cali Mahdi)

(MFCaydiid)

(Maxk. Islaamiga)

(Cabdiqaasim)

Wa Billaahi Towfiiq

Laxiriir: Shirwac55@hotmail.com